MAJALADDA MARAG

Cadadka 17-aad | Aug 2026

# DAWLADNIMO IYO AWOOD BARBAR SOCOTA:

## FAHAMKA KOOXAHA HUBAYSAN

Xildh. Cabdullaahi Faarax Mire

Bogga: 37



Xigashada Sawirka: AI

MAJALADDA MARAG


# Qorayaasha Majaladda



**Dheelliga Ilbaxnimada Aadanaha Qaybtii 1-aad**
Garaad Mukhtaar Mansuur — 4


Hoggaanka Dhaqanka Soomaaliyeed: **Doorkii Soo-Jireenka ahaa iyo Caqabadaha Maanta**
Caasha Geele Diiriye — 7


**Maxkamadda Dastuuriga ah:** Muhiimadeeda iyo Maqnaanshaheeda
Siciid Daauud Maxamed — 11


**AARGOOSIGA IYO DHIBAATADIISA:** Aragti Islaami ah iyo Xalka Bulshada Soomaaliyeed
Dr. Cabdinaasir Jaamac Warsame — 14


**Tilmaamaha Bulsho Xor Ah**
Cabdiraxmaan Cabdirisaaq (Korshe) — 17


**YAA HORTAAGAN DAWLADNIMO KA HANA-QAADDA DHUL-UDUG (PUNTLAND) Qaybta 1-aad**
Maxamed Yuusuf Cali — 20


**Culimada Caanka ah ee Dariiqada Qaadiriyadda ee Banaadir**
Dr. Cabdiraxmaan Baadiyow — 25


**XIGASHADA TAARIIKHDA:** Taariikhdu Ma Aha Warin Keliya
Cabdullaahi Cabdi (Cabdullaahi Dheere) — 29


**Taxanaha "Diin iyo Dawlad" Qeybta 4-aad**
Dr. Maxamed Cali Faarax — 32


**Dawladnimo iyo Awood Barbar Socota:** Fahamka Kooxaha Hubaysan
Xildh. Cabdullaahi Faarax Mire — 37


**Garsoorka iyo Halbeegga Cadaaladda Dalka Qaybta 1-aad**
Farxaan Cabdirashid Sugulle — 40

# Dhambaalka Tifaftiraha

Waxaa farxad iyo bogaadin mudan in aan soo saarno **cadadka 17-aad** ee **Majalladda Marag**, oo ah madal warbaahineed oo loogu talagalay in lagu daabaco macluumaad kala duwan sida warbixino, falanqayno, iyo aragtiyo ay diyaariyeen dad kala duwan oo ka tirsan bulshada, sida cilmi-baarayaal, suxufiyiin, aqoonyahano, hal-abuurro, iyo dadka kale oo khibrad iyo aqoon u leh dhinacyada kala duwan ee taabanaya nolosha bulshadeena.

Majaladan ujeedkeedu waa in la helo madal ka duwan warbaahinta dalka ka jirta, kuwaas oo inta badan xoogga saara soo tebinta dhacdooyinka maalinlaha ah. Majalladdan waxay hiigsaneysaa inay bulshada u gudbiso macluumaad dhigaal noqda, waxtar leh oo kor u qaada wacyiga iyo fahamka bulshada, kobciya doodaha iyo aragtiyaha caafimaadka qaba, soo bandhiga dhaliilo wax dhisaya oo daahfuran, islamarkaana dhiirrigeliya bulshada gaar ahaan dhallinyarada, si ay u noqdaan kuwo xog ogaal ah, si buuxda u fahma xaaladda dhabta ah, una gaari karaan go'aammo sax ah oo noloshooda iyo bulshada wax ku ool u ah.

Marag waxay ka madax-bannaan tahay aragtiyaha siyaasadeed ee kala duwan ee dalka ka jira, waxayna u furan tahay qof kasta oo doonaya inuu bulshada la wadaago fikrado, warbixino iyo falanqayno ku salaysan aqoon, cilmi iyo waayo-aragnimo.

**Cadadka 17-aad** ee Marag waxa uu xambaarsan yahay qormooyin iyo taxanayaal xiiso leh oo ay ka mid yihiin: Taxanaha "Diin iyo Dawlad" – Qaybtii 4-aad; "Dheelliga Ilbaxnimada Aadanaha" – Qaybtii 1-aad; "Culimada Caanka ah ee Dariiqada Qaadiriyadda ee Banaadir"; "Dawladnimo iyo Awood Barbar Socota"; "Yaa Hortaagan Dawladnimo Ka Hanaqaadda Dhul-udug (Puntland)?" – Qaybta 1-aad; "Argoosiga iyo Dhibaatooyinkiisa"; iyo "Hoggaanka Dhaqanka Soomaaliyeed," iyo qormooyin kale oo badan.

**Cabdi Cumar Bile**
Tifatiraha Guud

# DHEELLIGA ILBAXNIMADA AADANAHA

QEYBTA 1[AAD]



Garaad Mukhtaar Mansuur



Xigashada Sawirka: AI

# HORDHAC

Qormadani waa qayb ka mid ah taxane ka hadlaya Dheelliga Ilbaxnimada Aadanaha, kaas oo isku dayaya inuu si qoto dheer u eego su'aalaha waaweyn ee ku saabsan halka ay ilbaxnimadu ka timid, halka ay maanta marayso, iyo caqabadaha horyaalla mustaqbalkeeda.

Taxanuhu wuxuu isku dayayaa inuu isku xidho garashada, awoodda, anshaxa iyo horumarka si loo fahmo sababta ilbaxnimadu mararka qaar u horumarto, halka mararka kalena awooddeedu ay isu beddesho khatar ku soo noqota nafteeda.

Qormadan koowaad waxay ka bilaabmaysaa su'aal weyn oo ku saabsan The Great Filter (Shaandhada Weyn) iyo waxa laga yaabo inay sabab u tahay aamusnaanta weyn ee koonka, iyadoo soo jeedinaysa aragti ah in caqabadda ugu weyn ee ilbaxnimadu aysan ahayn hal hub, cudur ama tiknoolоojiyad, balse ay noqon karto dheelliga u dhexeeya awoodda ay hesho iyo xigmadda ay ku maamusho.

# WAYDIIMAHA HAREEYAY ILBAXNIMADA

Qiyaas in aad habeen madow kor u eegto cirka. Waxaad arkaysaa malaayiin xiddigood oo kala firdhisan, kuwaas oo mid kasta uu qorrax u yahay nidaam meereed u gaar ah. Cirbixiyayaashu maanta waxay qiyaasaan in koonku ka kooban yahay boqollaal bilyan oo galaxy (waa urur aad u weyn oo ka kooban xiddigo, meerayaal, gaas, boodh iyo walxo kale, dhammaantoodna isku haya cuf-isjiidad) ah, halka galaxy kasta uu leeyahay boqollaal bilyan oo xiddigood. Xiddigahaas badankoodna waxaa ku wareega meerayaal, qaar badan oo ka mid ahna waxay ku yaallaan waxa loo yaqaan aagga lagu noolaan karo (habitable zone), halkaas oo ay suurtagal tahay in biyaha dareeraha ahi ka jiri karaan.

Tirooyinkaas marka la isu geeyo, waxay u muuqataa in koonku yahay meel ay tahay in noloshu ku badan tahay. Haddana waxaa taagan su'aal caan ka noqotay cilmiga xiddigiska iyo falsafadda casriga ah:

**Haddaba haddii uu mantiqdu sidaa saadaalinayo, xaggee ayay joogaan ilbaxnimooyinkii kale?**

Waa su'aasha loo yaqaan Fermi Paradox. Su'aashu ma aha oo keliya in ay jiraan nooleyaal kale iyo in kale. Su'aashu waa sababta aynaan u arkin raad ilbaxnimooyin malaayiin sano naga hor maray. Haddii koonku da'diisu gaartay ku dhowaad 14 bilyan oo sano, maxaa diiday in ilbaxnimooyin aad nooga horreeyey ay gaaraan heer ay sahmiyaan galaxyada kale, gaar ahaan keenna, oo ugu yaraan uga tagaan raad muuqda? Maxaa aamusnaantan u sabab ah?

Waxaa la soo jeediyey jawaabo badan. Qaar waxay yiraahdeen waxaa laga yaabaa inaan keli ku nahay koonka. Qaar kale waxay ku doodeen in ilbaxnimooyinku aad u kala fog yihiin, sidaas darteedna aanay weligood is gaari karin. Kuwo kalena waxay soo jeediyeen in ilbaxnimooyinka horumara ay si ula kac ah uga dhuuntaan kuwa kale.

Laakiin mid ka mid ah aragtiyaha ugu saamaynta badan ayaa ahayd tan loo bixiyey The Great Filter. Aragtidani waxay qabtaa in jidka uu maro noole kasta si uu u noqdo mid ilbaxnimo heer sare gaarta ay hor taallo caqabad aad u adag. Caqabaddaas ayaa uu Robin Hanson u bixiyey The Great Filter "Shaandhada Weyn".

Maqaalkiisa uu ciwaanka uga dhigay "The Great Filter – Are We Almost Past It?" ama "Shaandhada Weyn – Miyaynaan Wali ka Gudubin?", Robin Hanson wuxuu isku weydiinayaa: Miyay shaandhadaasi inaga horraysaa oo ina sugaysaa, mise waan ka soo gudubnay?

Haddii aynu soo dhaafnay, waxa uu leeyahay in ay ka dhigan tahay in bani'aadamku hore uga soo gudbay marxalad ay aad u adkayd in laga gudbo. Haddii ay ina sugaysana, waxay la macno noqon kartaa in ilbaxnimadeennu ay ku wajahan tahay imtixaan aanay weli dhaafin.

Faylasuufyo iyo saynisyahanno badan ayaa tan ka sii ambaqaaday. Qaar waxay tilmaameen hubka nukliyeerka. Qaar waxay ka digeen isbeddelka cimilada. Qaar waxay farta ku fiiqeen cudurrada la farsameeyo, halka qaar kalena ay khatarta ugu weyn u arkaan garaadka macmalka ah. Aragti kastaa waxay leedahay tartame u gaar ah oo noqon kara "shaandhada weyn."

Laakiin dhammaan doodahaasi waxay wadaagaan hal astaan; dhammaantood waxay ka hadlayaan oo ay diiradda saarayaan waxa ina baabi'in kara inta aynaan noqon ilbaxnimo jebisa aamusnaanta dheer ee hareeraysay iyo kala fogaanshaha ilbaxnimooyinka suuragalka ah ee ka jira galaxyada kale.

In yar ayay milicsadaan ama isku dayaan inay ka hadlaan waxa keena ama sababa in waxyaabaha ina baabi'in kara ay yimaadaan. Marka la isku geeyo walaacyada laga qabo bamka atomikada ah, garaadka macmalka ah, wasakhowga deegaanka, cudurrada la farsameeyey iyo kuwo kale oo badan, waxay wadaagaan hal arrin: dhammaantood waa natiijooyin.

Haddaba haddii natiijooyinkaas ay keeni karaan hal arrin oo ah baaba'a ilbaxnimada aadanaha, sidoo kale waa inay yeeshaan sabab midaysan oo ka qoto dheer oo iyaga ka dambaysa.

Haddaba marka aynu xagashaas iska taagno dooddan, waxaan oran karnaa: waa suuragal in dhammaan soo jeedimahaas hore ay ka habowsanaayeen jidka saxda ah iyo halka ay taallo jawaabta Shaandhada Weyn ee Robin Hanson.

Waxaa suuragal ah in The Great Filter aanu ahayn shay gaar ah, sida hub, fayras ama tiknooloojiyad cusub. Waxaa laga yaabaa inuu yahay xeer. Xeer soo noqnoqda mar kasta oo ilbaxnimo gaarto heer horumar oo gaar ah.

Haddii xeerkaasi jiro, markaa waa in laga arki karaa taariikhda aadanaha, horumarka tiknooloojiyadda, iyo xitaa nidaamyada akhlaaqeed iyo kuwa bulsheed ee aadanaha.

Maqaalkani wuxuu soo jeedinayaa in dhammaan khatarahaas kala duwan ay yihiin muuqaalka hal arrin oo keliya. Halkaas arrin oo aan magac uga dhigi karno ama ugu yeeri karno:

## DHEELLIGA ILBAXNIMADA AADANAHA.

Waa mabda' sheegaya in ilbaxnimo kasta ay ku taagan tahay saddex tiir oo waaweyn: garasho, awood, iyo anshax. Marka saddexdaasi ay isku dheellitiran yihiin, ilbaxnimadu way sii jirtaa. Laakiin marka awooddu ka dheerayso garashada iyo anshaxa lagu hago, dheelligaas ayaa jaba.

Waxa markaas muuqda ma aha dhibaatada dhabta ah ee ilbaxnimada, balse waa astaamaheeda: dagaallo, wasakhow, hub, burbur deegaan iyo khataro kale oo isu eg.

Haddaba su'aasha ama waydiinta maqaalkani ma aha sida aan uga badbaadi karno hub gaar ah ama tiknooloojiyad gaar ah. Su'aashu waa mid ka sii qoto dheer:

Ma jirtaa ilbaxnimo sii noolaan karta haddii awooddeedu ka dheerayso xigmaddeeda? Mise waa halkaas meesha ay Shaandhada Weyn taallo, ee ilbaxnimadu ku dhimato?

**Qore:** Garaad Mukhtaar Mansuur



# HOGGAANKA DHAQANKA SOOMAALIYEED:

## DOORKII SOO-JIREENKA AHAA IYO CAQABADAHA MAANTA



Caasha Geele Diiriye



**Xigashada Sawirka**: AI

# DIB U JALEECID GUUD

Hoggaanka dhaqanku wuxuu leeyahay door muhiim ah oo ku dhisan nidaamka iyo xeerarka dhaqanka Soomaaliyeed. Qofka loo dooranayo hoggaan dhaqameed, marka hore waxaa soo xula beeshiisa, iyadoo lagu eegayo aqoontiisa diineed iyo midda maadiga ah, kartidiisa, xilkasnimadiisa, akhlaaqdiisa, dadnimadiisa iyo deeqsinimadiisa, iyo inuu awood u leeyahay inuu matalo danaha beesha doorатay, xiriir wanaagsanna la yeesho beelaha kale ee ay bahwadaagta yihiin iyo guud ahaan hoggaanka dhaqanka Soomaaliyeed.

Xilliga xulashada isimka, marka beelweynta beeshu isku afgartaan soo xulidda isimka ku habboon, ha ahaado mid soo jireen ah ama xulasho cusub, waxaa loo gudbiyaa garboodka iyo nabadoonnada beesha. Iyaguna way qaataan xulashada iyo soo jeedinta ay beelweyntu soo samaysay. Ugu dambayntii, go'aanka waxaa la horgeeyaa beel-wadaagga ay taladu ka dhaxayso, oo iyaguna gudooma, ka hor inta aan caleemo-saarka guud la qaban, si xulashada isimkaasi u noqoto go'aan ay beesha uu ka soo jeedo iyo beel-wadaagtuba ku qanacsan yihiin.

Hoggaanka dhaqanku ma aha xil qof keliya looga haro; waa hannaan ku dhisan wada-tashi, xulasho iyo heshiis bulsho, oo ay qayb ka yihiin beelweynta, garboodka iyo nabadoonnada uu isimku ka soo jeedo, iyo beel-wadaagga guud ee ay taladu ka dhaxayso. Marka isimku ka soo dhammaysto beesha doorатay iyo beel-wadaagga ay taladu ka dhaxayso, waxaa loo diyaariyaa caleemo-saar lagu markhaati-furayo dhaqanka Soomaaliyeed, iyadoo la casumo inta habboon si loo shaaciyo isimka cusub ee ku soo biiray hoggaanka dhaqanka Soomaaliyeed. Waxaa la sameeyaa xaflad weyn oo lagu maamuusayo caleemo-saarka iyo caano-shubka isimka cusub.

Marka isimka cusub la doorto oo loo caano-shubo, beesha soo xulatay ayaa kafaala qaadda dejintiisa iyo xoolo-goyntiisa, si uu u noqdo isim baahi-tiran. Waxaa la siiyaa xoolo ku filan oo nooc walba leh, si uu uga maarmo dhaqaale uu meelo kale ka raadsado. Xoolo-goynta isimku waxay noqotaa mid ku filan noloshiisa, hawlihiisa hoggaamineed iyo inuu awood u yeesho inuu ka qayb qaato daminta colaadaha iyo xallinta khilaafaadka ka dhex dhaca beeshiisa iyo beelaha kale, haddii uu khilaaf ama dagaal dhex maro.

Isimka la doorto inta badan waxaa fadhigiisu noqdaa deegaan ka mid ah deegaannada ay beeshu degto, ama deegaankii fadhiga u ahaa isimkii ka horreeyey ee taariikh ahaan lagu yaqaanay.

**Maxaa Keenay Isbadalka ku Dhacay Doorkii Hoggaanka Dhaqanka**

Isbeddelka ugu horreeya wuxuu yimid markii isimku ka wareegay deegaankii ay beeshu ku caleemo-saari jirtay, ee beesha dhexda u ahaa, una soo xuubsiibtay inuu degaan ka dhigto magaalooyinka waaweyn ee ay dawladuhu fadhiyaan, siyaasaddana lagu karkariyo.

Taasina waxay keentay inuu u baahdo adeegyo ka badan kuwii uu hore u isticmaali jiray, sida guri magaalo, gaadiid, kulamo badan iyo la macaamilka hay'adaha dawladda. Arrintaasi waxay sidoo kale fududaysay in isimku si dhow ugu dhawaado siyaasadda iyo siyaasiyiinta, sida inta badan maanta dhacda.

Marka ay xaaladdaasi timaaddo, waxaa laga yaabaa in isimku ka leexdo doorkii iyo hab-dhaqankii soo jireenka ahaa ee hoggaanka dhaqanka, isla markaana uu noqdo saaxiib dhow ama garab siyaasadeed oo ay yeeshaan siyaasiyiinta iyo dawladda deegaanka ka talisa.

**Marka arrinkaasi yimaaddo, isimka waxaa ku dhaca:**

1. **Kalsoonida bulshada oo hoos u dhacda:** Hoggaanka dhaqanka waxaa laga filayaa inuu dhex u ahaado bulshada oo dhan, gaar ahaan beeshiisa uu matalo. Haddii uu dhinac siyaasadeed raaco, waxay keeni kartaa in qayb ka mid ah beeshiisa iyo bulshada guud ahaan ay dareemaan inuusan si dhexdhexaad ah u matali karin.

2. **Kala qaybsanaan beeleed:** Siyaasaddu mararka qaar waxay ku dhisan tahay dano iyo tartan. Haddii hoggaanka dhaqanku dhinac siyaasadeed raaco, waxay keeni kartaa in bulshada dhexdeeda ay ka dhalato kala aragti duwanaansho iyo khilaaf, gaar ahaan marka taageerada siyaasadeed loo fasirto inay tahay mowqifka beesha oo dhan.

3. **Wiiqanka doorka dhaqanka:** Hoggaanka dhaqanku wuxuu leeyahay door gaar ah oo ku saabsan nabadaynta, xallinta khilaafaadka, isu keenidda iyo isku haynta bulshada. Ku milanka

siyaasadda iyo la safashada dhinac gaar ah waxay dhaawici kartaa awoodda uu u leeyahay inuu dhexdhexaadiyo bulshada marka khilaaf yimaado.

4. **Magaca iyo sumcadda beesha oo siyaasadda lala xiriiriyo:** Haddii hoggaamiye dhaqameed si xooggan ugu ololeeyo siyaasi ama dhinac siyaasadeed oo gaar ah, waxaa dhici karta in bulshada inteeda kale u aragto in beesha oo dhan ay taageersan tahay aragtida ama siyaasadda hoggaanka dhaqanka. Taasi waxay meesha ka saari kartaa kala duwanaanshaha aragtiyeed ee ka dhex jira beesha, iyadoo laga yaabo in aanay dhammaan xubnaha beeshu isku aragti ka ahayn.

5. **Khilaaf ku yimaadda nidaamkii lagu soo doortay:** Maadaama isimka dhaqanka ay marka hore beeshu soo xulato, kadibna garboodka, nabadoonnada beesha iyo beel-wadaagtu ay wada qaataan, waxaa hoggaamiyahaas laga rabaa oo laga filayaa inuu ilaaliyo kalsoonida nidaamkaas, oo aanu xilka dhaqanka u adeegsan dano siyaasadeed oo gaar ah.

6. **Waxaa soo batay isimo badan oo laga dul sameeyey isimkii soo jireenka ahaa:** Marka siyaasiyiintu u arkaan in isimkii soo jireenka ahaa aanu la jaanqaadi karin ama fulin karin danahooda siyaasadeed, waxaa la sameeyaa isim kale oo aanay beeshu dooran. Dawladuhuna waxay u aqoonsadaan isim ay beeshu leedahay, wayna la macaamilaan. Taasi waxay keentay in maanta la arko isimo tiro badan oo beel walba dhawr isim wada sheeganayso, iyadoo siyaasiyiintu si siman ula macaamilaan, waliba mudnaanta siiyaan isimka ugu hoggaan-qabow oo danahooda u fududeeya, iyadoo uu joogo isimkii soo jireenka ahaa ee beeshu soo dooratay, dariiqadii xulashada hoggaanka dhaqankana soo maray. Qaran-jabka kale ee ku dhacay isimada dhaqanka wuxuu gaaray in, iyagoo taagan beelihii doortay oo xulidda wakiilladoodana ay iyagu lahaayeen, laga wareego ama magacooda loo isticmaalo isim aan ahayn kii beeshu ku caano-shubatay, lagana dhufsado shaabaddii hoggaanka dhaqanka.

7. **Ku milanka siyaasadda oo hoos u dhigay meeqaamka hoggaanka dhaqanka:** Sidoo kale, waxaa lumay oo meesha ka baxay is-qadarintii iyo xeerarkii isimadu isku tixgelin jireen, oo ku dhisnaa fac-weynaanta iyo guddoomintooda oo aan hadal ka jiri jirin.

8. **Lumitaanka doorkii marjacnimada:** Marka la isku soo duubo, waxaan oran karaa isimada dhaqanku waxa ugu weyn ee ay lumiyeen waa doorkoodii u gaarka ahaa ee marjacnimada, oo marka xaajo murugto looga dambeyn jiray, ha ahaato mid siyaasadeed, mid bulsho ama mid dhaqan, dibna loogu soo celin jiray xalinteeda.

9. **Wiiqanka wada-tashiga:** Doorkii ay lahaayeen hoggaanka dhaqanka waxaa kale oo dhaawacay in marar badan isimku go'aan kaligiis qaato, isaga oo aan la tashan nabadoonnada iyo garboodka beesha, gaar ahaan xilliyada uu siyaasadda u janjeero.

10. **Khilaaf, kooxaysi iyo kala qaybsanaan:** Taranka iyo ku milanka siyaasadda waxay sidoo kale hoggaanka dhaqanka gaarsiisay khilaaf dhexdooda ka abuurma, kooxaysi iyo inay awoodi waayaan inay si mideysan uga hadlaan danta guud. Waana tan keenta in aan aragno isimo kala shirsan, kala koox ah oo go'aamo kala duwan soo saaraya, iyagoo qoloba garab siyaasadeed dhinaca ku haya, doorkoodii dhaqankuna sidaas dhaawac ku gaaray. Dhaawaca soo gaaray meeqaamka hoggaanka dhaqanka waxaa loo aanaynayaa isimada oo doorkoodii dhaqan ka tallaabsaday iyo dawladaha iyo siyaasiyiinta oo kaga faa'iidaystay danahooda siyaasadeed. Fadhiyadoodii ka fogaana siyaasadda oo ay ka soo haajireen, dhinaca kalena khilaafka dhexdooda ka jira oo isla siyaasiyiintu ku lug leeyihiin ayaa keenay in isimada qaarkood aanay isugu iman xalinta danta guud, khilaafkooduna gaaro in aanay xiriir isimnimo xataa yeelan.

## TALO-SOOJEEDIN

Maadaama aanu goobjoog u nahay dhaawaca gaaray doorkii hoggaanka dhaqanka, haddana waxaan aaminsanahay in, maadaama ay yihiin hoggaan aan cidina magacaabin ee ay beeshoodu cimaamadday, ay doorkoodii soo ceshan karaan, dibna u sixi karaan wixii ka khaldamay hoggaankooda. Talooyinka hoos ku xusan ayaan is leeyahay wax bay ka tari karaan soo noolaynta doorkii shariifka ahaa iyo qiyamkii ay lahaayeen hoggaanka dhaqanka, si ay si buuxda ugu ilaashadaan madax-bannaanidooda iyo matalaaddooda bulsho:

1. In dawladaha loogu baaqo in ay faraha kala baxaan faragelinta hoggaanka dhaqanka, sharciyaddana kala laabtaan isim kasta oo aan beeshiisu soo dooran, soona marin habraacii lagu dooran jiray hoggaanka dhaqanka beesha.

2. In qabiillada iyagu leh isim ay si sharci ah u doorteen ay shaaciyaan isimka ama isimada beeshu si sharci ah u dooratay, magacyadoodana u gudbiyaan cid kasta oo ay khusayso, cod dheerna ku sheegaan in isimada beesha loo magacaabay ee aan sharciyadda ku imaan aysan ahayn isimo beeshu leedahay. Dawladuna qabiillada ha ku ixtiraamaan doorashada hoggaankooda dhaqanka iyo doorkooda.

3. In isimadu ku ekaadaan doorkoodii dhaqanka iyo hawlihii ay beelaha ugu xil saarnaayeen, saldhigyadoodii ay qabiilka ku matali jireen u fariistaan, magaalooyinka waaweyn ku yaraadaan, ku milanka siyaasadda iyo qof-jeclaysigana ka waantoobaan, beesha ay matalaanna dhexdhexaad u noqdaan, ragga oo keliya aanay dhinacna saarin.

4. Isimka la doortay waa inuu ixtiraamaa masuuliyadda la saaray, ogaadana in xilka hoggaanka dhaqanku uu ka sarreeyo loollanka siyaasadeed.

5. Haddii isimku yeesho han iyo aragti siyaasadeed, waa inuu kala saaraa aragtidiisa gaarka ah iyo xilka hoggaanka dhaqanka ee uu hayo. Haddii uu siyaasadda aad u xiiseeyo, waa inuu beesha ku celiyo xilkii hoggaanka dhaqanka ee uu hayey, si doorkiisa dhaqanka iyo hankiisa siyaasadeed aanay isugu khaldin.

6. Isimka la doortay waa inuu dhammaan siyaasiyiinta beeshiisa iyo dadka hanka leh ula dhaqmaa si siman, iyadoo aan loo eegin in uu qof is-xijiyo, jinsi kasta ha ahaadee.

7. Isimka la doortay waa inuu xoogga saaraa nabadda, midnimada, wada-tashiga iyo danaha guud ee mandiqadda uu ku nool yahay, tan beesha cimaamadday iyo xoojinta xiriirka wanaagsan ee hoggaanka dhaqanka beelaha kale ee Soomaaliyeed.

8. Isimka beesha, haddii arrin siyaasadeed looga baahdo, waa in hadalkiisu noqdaa mid ku salaysan danta guud ee bulshada, uuna ku sifoobin olole uu ugu adeegayo shaqsi ama xisbi uu gacan-saar la leeyahay.

9. Tan igu muhiimsan waa in isimku ilaaliyaa kalsoonidii iyo heshiiskii ay beeshu ku siisay xilka isimka hoggaanka dhaqanka.

10. Isimku inuu xirfaddiisa aqooneed iyo tan siyaasadeed horumariyo kama reebna, balse waa inuusan siyaasadda ku milmin; ee uu bulshada u noqdaa rukun adag oo ay dhammaantood ku wada tashadaan, dhexdhexaad u ah, lana jecel yahay.

Dhammaan akhristayaasha iyo hoggaanka dhaqankaba waxaan ka raalligelinayaa haddii qormadan aan erayo qadaf ah ku qoray. Ugama jeedin jaa'ifo; waxa iga ahayd soo bandhigidda dhibka aan indhahayaga ku arkay ee ku dhaca hoggaanka dhaqanka, iyo inaanan kala bakhaylin in aan la wadaago talooyinkayga aan is leeyahay waa lagu sixi karaa wixii khaldamay. Maadaama dhaqanku noo yahay saldhigga nolosheenna, haddii waxyeello gaartana ay dhammaanteen ina wada saamaynayso.



# MAXKAMADDA DASTUURIGA AH:
## MUHIIMADEEDA IYO MAQNAANSHAHEEDA



Siciid Daauud Maxamed




Xigashada Sawirka: AI

## HORDHAC

Dastuurka Ku-meel-gaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya wuxuu qeexayaa in nidaamka garsoorka qaranku ka koobnaan doono saddex heer oo isku xigxiga: Maxkamadda Dastuurka, Maxkamadaha Heerka Dowladda Federaalka, iyo Maxkamadaha Heerka Dawladaha Xubinta ka ah Dowladda Federaalka. Maxkamadda Dastuurku waxay ku taal heerka ugu sarreeya garsoorka, waxaana loo arkaa hay'adda xaqiijisa in sharciyada dalku waafaqsan yihiin dastuurka iyo mabaadi'da dowladnimada casriga ah.

Si kastaba ha ahaatee, tan iyo markii dastuurkan la ansixiyay 2012, Soomaaliya ilaa iyo hadda ma dhisan Maxkamad Dastuuri ah oo si buuxda u shaqaynaysa. Maqnaanshaheedu wuxuu abuuray hoos u dhac ku yimid habka loo xalliyo khilaafaadka dastuuriga ah, iyo boos madhan oo ay ku buuxsadaan go'aammo siyaasadeed oo aan lagu salaynin garsoor madax-bannaan.

## MAXKAMADDA DASTUURKA: MACNAHEEDA IYO DOORKEEDA

Qodobka 108-aad ee dastuurka wuxuu u kala saaraa maxkamadaha qaranka saddex heer: Maxkamadda Dastuurka, Maxkamadaha Heerka Dowladda Federaalka, iyo kuwa Heerka Dawladaha Xubinta ka ah Dowladda Federaalka. Sida ku cad Qodobka 109B, Maxkamadda Dastuurku waxay ka koobnaan doontaa shan Garsoore, oo ay ku jiraan Garsooraha Sare iyo Ku-xigeenkiisa. Garsoorayaashaan waxaa magacyadooda soo jeediya Guddiga Adeegga Garsoorka, waxaa ansixiya Aqalka Hoose ee Baarlamaanka, waxaana ugu dambaysta magacaaba Madaxweynaha Jamhuuriyadda.

Maxkamaddan waxaa loogu talagalay inay noqoto hay'adda ugu sarreysa ee fasirta Dastuurka, isla markaana go'aan ka gaarta khilaafaadka ka dhex dhasha Dowladda Federaalka iyo Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka. Waxay sidoo kale hubisaa waafaqsanaanta sharciyada uu Baarlamaanku meel mariyo iyo Dastuurka, iyadoo awood u leh inay go'aan ka gaarto dacwadaha xil-ka-qaadista Madaxweynaha. Sidaa awgeed, Maxkamadda Dastuurku waa hay'ad aas-aasi u ah ilaalinta sarreynta Dastuurka iyo xaqiijinta isu-dheellitirka awoodaha saddexda laamood ee dowladda: laanta sharci-dejinta, laanta fulinta, iyo laanta garsoorka.

## SOOMAALIYA HORE MA U YEELATAY MAXKAMAD DASTUURI AH?

Waxaa xusid mudan in Dastuurka Ku-meelgaarka ah ee la ansixiyay sannadkii 2012 uu si cad u qeexay jiritaanka Maxkamadda Dastuurka, taasoo muujinaysa in fikradda iyo qaab-dhismeedkeeda sharci ay hore u jireen. Hase yeeshee, waxaa jira farqi weyn oo u dhexeeya qodob dastuur lagu qoray iyo hirgelintiisa dhab ahaan. Ilaa maanta, Guddiga Adeegga Garsoorka (GAG)—oo ah hay'adda keliya ee Dastuurku u xilsaaray soo-jeedinta magacyada garsoorayaasha Maxkamadda Dastuurka—si buuxda uma dhisna mana shaqaynayo. Taasina waxay caqabad weyn ku noqotay dhismaha iyo hawlgelinta Maxkamadda Dastuurka, maadaama aan la magacaabi karin garsoorayaasheeda iyadoo aan Guddiga Adeegga Garsoorku gudan waajibaadkiisa dastuuriga ah.

Taariikh ahaan, Soomaaliya waxay marar badan isku dayday inay dib u dhisto garsoorkeeda ka dib burburkii dowladdii dhexe ee 1991. Xitaa Dowladda Kumeel-gaarka ahayd (TNG) ee Carta lagu soo aasaasay 2000 waxay ahayd tusaale muujinaya dadaalka dib-u-dhiska garsoor rasmi ah, laakiin maxkamad dastuuri ah oo shaqaynaysa lama gaarin. Sharciga garsoorka ee hadda shaqaynaya waxaa la sameeyay xilligii dalku lahaa nidaam dowladeed oo dhexe, halka Soomaaliya hadda leedahay nidaam federal ah! taasoo keentay in sharciga xukumaya garsoorka aan loo ansixin sida loogu baahan yahay.

## SABABAHA AY MAXKAMADDA DASTUURKU WELI U MAQAN TAHAY

Sidaan hore u soo sheegay, Guddiga Adeegga Garsoorka (GAG), oo ah shuruudda ugu horreysa ee lagama maarmaanka u ah dhismaha Maxkamadda Dastuurka, weli si buuxda uma shaqaynayo. Sidoo kale, dib-u-eegista Dastuurka oo socotay in ka badan 14 sano ayaa dib u dhigtay hirgelinta hay'adaha uu Dastuurku jideeyay. Inkastoo Baarlamaanku bishii Maarso 2026 ansixiyay xeer-ku-darkii ugu dambeeyay ee Dastuurka, haddana

weli waxaa dhiman afti dadweyne oo ansixisa, taas oo ah tallaabada ugu muhiimsan ee lagu dhamaystirayo hirgelinta hay'adaha cusub, oo ay ka mid tahay Maxkamadda Dastuurka.

Waxa kale oo dib u dhaca sabab u noqday xiisadaha siyaasadeed ee soo noqnoqday ee u dhexeeya Dowladda Federaalka iyo qaar ka mid ah Dowladaha Xubnaha ka ah Federaalka. Sannadkii 2026, Guddoomiyaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka ayaa ku baaqay in la dedejiyo dhismaha Guddiga Sare ee Adeegga Garsoorka iyo Maxkamadda Dastuurka, baaqaas oo muujinaya in inkastoo Dastuurka la ansixiyay 2012, labadaas hay'adood aan weli la dhisin.

## CAQABADAHA SIYAASADEED

Is-afgarad la'aanta u dhexeysa Dowladda Federaalka iyo Dowladaha Xubnaha ka ah Federaalka ayaa si weyn u caqabadaysay hirgelinta hay'adaha garsoorka. Isbeddellada siyaasadeed ee soo noqnoqda iyo khilaafaadka joogtada ahi waxay keeneen in mabaadi'da dastuuriga ah mararka qaar loo adeegsado dano siyaasadeed, halka mararka kalena la iska indho-tiro. Duruufahaas awgood, way adkaanaysaa in Soomaaliya laga hirgeliyo Maxkamad Dastuuri ah oo madax-bannaan laguna kalsoonaan karo, maadaama dhismaheedu u baahan yahay is-afgarad siyaasadeed oo ballaaran.

## WAXA LOO BAAHAN YAHAY SI LOO DHISO MAXKAMADDA DASTUURKA

Marka la eego xaaladda kor ku xusan, waxaa jira shan shuruudood oo aasaasi u ah dhismaha Maxkamadda Dastuurka. Marka koowaad, waa in la dhammaystiraa lana hawlgeliyaa Guddiga Adeegga Garsoorka, oo ah hay'adda keliya ee Dastuurku u xilsaaray soo-jeedinta magacyada garsoorayaasha. Ilaa guddigan si buuxda u shaqeeyo, ma jiri karto saldhig sharci iyo hay'adeed oo lagu dhiso Maxkamadda Dastuurka.

Marka labaad, waa in la dhammaystiraa dib-u-eegista Dastuurka, lana ansixiyaa afti dadweyne si loo helo Dastuur ay si buuxda ugu heshiiyaan Dowladda Federaalka iyo dhammaan Dowladaha Xubnaha ka ah Federaalka, kaas oo saldhig u noqda dhismaha iyo shaqada Maxkamadda Dastuurka.

Marka saddexaad, waa in la gaaraa is-afgarad siyaasadeed oo dhab ah oo u dhexeeya Dowladda Federaalka iyo Dowladaha Xubnaha ka ah Federaalka, si Maxkamadda Dastuurku u noqoto hay'ad madax-bannaan, dhexdhexaad ah, oo ay dhammaan dhinacyadu ku kalsoonaadaan, halkii ay noqon lahayd mid loo arko inay u janjeerto dhinac gaar ah.

Marka afaraad, waa in la magacaabaa garsoorayaal leh aqoon qoto dheer oo ku saabsan sharciga, Shareecada Islaamka iyo dhaqanka Soomaaliyeed, isla markaana ka madax-bannaan cadaadis iyo saameyn siyaasadeed, si go'aannadoodu ugu dhisnaadaan mabaadi'da caddaaladda iyo sharciga.

Marka shanaad, waa in la xoojiyaa wacyiga bulshada iyo kalsoonida ay ku qabaan nidaamka garsoorka, iyadoo Maxkamadda Dastuurka si waafaqsan loogu xiriirinayo labada nidaam ee kale—Shareecada Islaamka iyo Xeer Dhaqameedka—si ay u noqoto hay'ad ka tarjumaysa qiyamka, dhaqanka iyo baahiyaha bulshada Soomaaliyeed.

## GUNAANAD

Maxkamadda Dastuurku waa tiirka ugu muhiimsan ee nidaamka garsoorka casriga ah, waana hay'adda keliya ee awood u leh inay si madax-bannaan oo sharci ku dhisan u xalliso khilaafaadka dastuuriga ah. Maqnaanshaheedu wuxuu abuuray firaaqo hay'adeed oo ay inta badan buuxiyaan go'aanno siyaasadeed halkii ay ka buuxin lahayd garsoor madax-bannaan. Sidaa darteed, dhismaha Maxkamadda Dastuurka ma aha arrin la sugo ilaa laga gaarayo xasilooni siyaasadeed oo buuxda; taa beddelkeeda, waa mid ka mid ah aas-aasyada lagama maarmaanka u ah xaqiijinta xasilloonida, sarreynta sharciga, iyo dowladnimo ku dhisan Dastuur.

## TIXRAAC

Dastuurka Ku-meel-gaarka ah ee JFS (2012), Qodobbada 105–109C; "Judiciary of Somalia," Wikipedia; Ministry of Justice and Constitutional Affairs, "Rule of Law and Independent Judiciary in Somalia" (2025); ConstitutionNet (2026); Africa at LSE, "Somalia is About to Enter a Constitutional Crisis" (2026).

# AARGOOSIGA IYO DHIBAATADIISA:

## ARAGTI ISLAAMI AH IYO XALKA BULSHADA SOOMAALIYEED



Dr. Cabdinaasir Jaamac Warsame Islaam



Xigashada Sawirka: Reuters

Aargoosigu waa mid ka mid ah dhabar-jabka ugu waaweyn ee ku habsaday hannaanka geeddi-socodka, nabadgelyada iyo maamuuska bulshada Soomaaliyeed. Waa dab aan kala soocin kan dambiga galay iyo kan aan waxba galabsan, kaas oo sii huriya colaado sokeeye oo aysan cidina ku guulaysan.

Si aan u daweyno bogsiinteeda Soomaalinimo, waa in aan si dhab ah u fahamno dhibaatada aargoosiga, waxa ay ka qabto diinta Islaamku, iyo doorka ay tahay inay bulshadu ka qaadato ciribtirkiisa.

## DHIBAATADA BULSHO IYO DHAQAALE EE AARGOOSIGA

Aargoosigu kuma eka bartamaha laba qof ama laba beelood oo keliya; wuxuu burburiyaa guud ahaan qaab-dhismeedka bulshada. Dhaqanka dhiig-doonka ah wuxuu leeyahay dhibaatooyin dhowr ah:

1. **Dilka dadka aan dambiga lahayn:** Waxaa inta badan la dilaa dad aan dambiga waxba ku lahayn, sida dhallinyarada aqoonyahanka ah, odayaasha ama ganacsatada, keliya maadaama ay ka soo jeedaan beesha uu qofkii dambiga galay ka dhashay.
2. **Barakaca iyo cabsida:** Aargoosigu wuxuu abuuraa xaalad xasillooni-darro ah oo qoysas badan ku qasbaysa inay ka barakacaan deegaannadooda iyo hoygooda. Cabsida laga qabo in qof aan waxba galabsan lagu bartilmaameedsado aargoosi ayaa dhaawac weyn u geysata nolol-maalmeedka bulshada.
3. **Hagardaamada Dhaqaale:** Colaadda ku dhisan aargoosigu waxay xirtaa jidadka ganacsiga, waxay baabi'isaa maalgashiga, waxayna reebtaa dhiillo iyo cabsi u diidda dhallinyarada fursadaha shaqo iyo horumar.

## ARAGTIDA ISLAAMKA EE AARGOOSIGA

Diinta Islaamku waxay u timid si ay u dhowrto nafta, maalka iyo sharafta aadanaha. Islaamku wuxuu si adag u mamnuucay in qof aan dambi lahayn loo qabto dambiga uu qof kale galay.

Eebbe Sareeye wuxuu Qur'aanka ku yiri:

قُلْ أَغَيْرَ اللَّهِ أَبْغِي رَبًّا وَهُوَ رَبُّ كُلِّ شَيْءٍ ۚ وَلَا تَكْسِبُ كُلُّ نَفْسٍ إِلَّا عَلَيْهَا ۚ وَلَا تَزِرُ وَازِرَةٌ وِزْرَ أُخْرَىٰ ۚ ثُمَّ إِلَىٰ رَبِّكُمْ مَرْجِعُكُمْ فَيُنَبِّئُكُمْ بِمَا كُنْتُمْ فِيهِ تَخْتَلِفُونَ

(Suuradda Al-Ancaam: 164)

"Nafna ma xammilato (ma qaaddo) dambiga naf kale."

Haddii uu shakhsi dambi galo, sharciga Islaamku wuxuu qabaa in isaga oo keliya lala xisaabtamo, oo aan qof kale oo qaraabadiisa, reerkiisa ama qabiilkiisa ah dhib loogu geysan karin dambigaas.

## HANNAANKA QISAASTA IYO CIDDA FULISA

Islaamku wuxuu dhigay sharciga Qisaasta, laakiin taasi uma bannaana qof kasta ama beel kasta inay gacanteeda ku fuliso. Arrimaha ciqaabta iyo fulinta xukunka waxay u baahan yihiin hannaan garsoor iyo sharci oo sugan.

Sidaas darteed, qisaastu ma noqon karto marmarsiiyo loo adeegsado dilal aan sharci ahayn, aargoosi beeleed ama in qof aan waxba galabsan lagu ciqaabo fal uusan isagu gelin.

## MUHIIMADDA CAFISKA IYO HESHIISIINTA

Islaamku wuxuu aad u dhiirrigeliyaa cafiska iyo maslaxadda. Qur'aanku wuxuu sheegay in qofkii cafiya oo heshiis sameeya uu ajarkiisa Eebbe ka helayo:

وَجَزَاءُ سَيِّئَةٍ سَيِّئَةٌ مِّثْلُهَا ۖ فَمَنْ عَفَا وَأَصْلَحَ فَأَجْرُهُ عَلَى اللَّهِ ۚ إِنَّهُ لَا يُحِبُّ الظَّالِمِينَ

(Suuradda Ash-Shuuraa: 40)

"Jawaabta xumaantu waa xumaan la mid ah; qofkii cafiya oo heshiis sameeya, ajarkiisu wuxuu saaran yahay Eebbe. Eebbena ma jecla kuwa dulmiga sameeya".

Sidaas darteed, inkasta oo caddaaladdu leedahay meel muhiim ah, haddana cafiska iyo heshiisiintu waxay leeyihiin fadli iyo ajar gaar ah oo Islaamku ku boorrinayo.

# XALKA IYO DOORKA BULSHADA SOOMAALIYEED

Si loogu guulaysto ciribtirka aargoosiga iyo saamayntiisa xun, waa in la helaa maamul, nidaam iyo wadajir bulsho oo u taagan xal-u-helidda dhibaatadan.

1. **Dhismaha Garsoor awood leh**: In la helo maxkamado caddaalad ah oo ciqaaba qofka dambiga galay, si aysan bulshadu ugu qasbanaan inay gacmaheeda ku aargoosato.
2. **Baraarujinta iyo aqoonta diinta:** Culimada iyo maamulladu waa inay si daacad ah u baahiyaan in aargoosigu yahay fal xun oo ka hor imanaya mabaadi'da Islaamka, lagana tago dhaqanka xun ee "dhiig- raadinta ah" iyo caado kasta oo dhiigga qof aan waxba galabsan loogu daadinayo fal uu qof kale geystay.
3. **Doorka odayaasha iyo dhaqanka:** Odayaasha dhaqanku waa inaysan ka qayb qaadan asturidda ama difaaca eedaysanaha. Waa inay u dhiibaan sharciga qofka dambiga galay, halkii ay beel ahaan uga fariisan lahaayeen arrin u baahan caddaalad iyo garsoor.

   Odayaasha dhaqanku waa inay noqdaan kuwa ka shaqeeya nabadda, heshiisiinta iyo joojinta silsiladda aargoosiga, halkii ay sii hurin lahaayeen colaadaha.
4. **Xaqiijinta nabadgelyada iyo sinnaanta:** Waxaa lagama maarmaan ah in la baahiyo maamul-wanaag, lana abuuro jawi qof kasta oo Soomaali ah uu ku tixgeliyo maamuuska iyo karaamada nafta aadanaha.

   Qofku waa inuu dareemaa in naftiisa iyo xuquuqdiisa uu ilaalinayo sharci iyo nidaam, ee aysan ku xirnayn beesha uu ka dhashay ama awoodda kooxdiisa.

# GUNAANAD

Aargoosigu waa dab naftiisa cuna, mana aha xal loogu jawaabo dhibaato laga maarmi karo. Marka qof lagu dilo qof kale dambigiis, dhibaatadu ma dhammaanayso; waxay u gudubtaa qoys kale, beel kale iyo jiil kale.

Kala dambaynta diinta Islaamka iyo ku dhaqanka caddaaladda ayaa ah jidka ay bulshada Soomaaliyeed ku heli karto nabad, barwaaqo iyo horumar waara.

Bulsho rabta inay ka gudubto colaadaha soo noqnoqda waa inay ka gudubtaa dhaqanka ah in dambiga qof lagu raaciyo dad aan waxba galabsan. Caddaaladdu waa inay noqotaa meesha laga raadiyo xaqa, halka cafiska iyo heshiisiintuna ay noqdaan jidka lagu soo afjaro colaadda.

**Qore:** Sheekh Cabdinaasir Jaamac Warsame, PhD

Madaxweynaha Jaamacadda Frontier, Garoowe, Puntland – Soomaaliya



# TILMAAMAHA BULSHO XOR AH



Cabdiraxmaan Cabdirisaaq
(Korshe)



Maqaalkan kooban waxa uu isbarbardhig guud ku samaynayaa mabaadi'da Islaamka iyo kuwa liberalism-ka Reer Galbeedka, gaar ahaan marka laga hadlayo fikradda bulsho xor ah iyo ilaalinta xuquuqda aadanaha. Waxa uu dul istaagayaa waxa lagu qeexo bulsho xor ah, mabaadi'da ay ku dhisan tahay iyo xuquuqaha aasaasiga ah ee uu qofku leeyahay. Sidoo kale, waxa si gaar ah loo eegayaa bulshada Soomaaliyeed, oo dastuurkeedu qeexayo xuquuqda iyo xorriyadaha muwaadiniinta, iyo muhiimadda ay leedahay in xuquuqahaasi aanay ku ekaan qoraal dastuuri ah oo keliya, balse ay noqdaan kuwo si dhab ah loo dhowro loona dhaqangeliyo.

Waxaan aragtiyaha xorriyadda ee uu ku qoray Ashford buuggiisa "Principles for a Free Society" barbar dhigi doonaa buugga qiimaha badan ee uu qoray Shiikh Maxamed Al-Ghazaali ee ahaa "Xuquuqda Aadanaha marka la barbar dhigo Mabaadi'da Islaamka iyo Baaqa Qaramada Midoobay".

Inta aynaan horay u sii socon, bal marka hore aynu kala baranno labada mufakir ee fikradahooda aynu isbarbardhigga ku salaynayno:

Shiikh **Muxamed Al-Ghazaali Al-Saqa** (1917–1996) wuxuu ahaa caalim, mufakir iyo daaci Islaami ah oo Masri ah, kana mid ahaa hormuudkii dib-u-cusboonaysiinta fikirka Islaamka qarnigii 20aad. Wuxuu wax ku bartay Jaamacadda Al-Azhar, wuxuuna si weyn uga shaqeeyay isku xirka fahamka diinta, caqabadaha bulshada iyo arrimaha casriga ah. Qoraalladiisu waxay si gaar ah diiradda u saareen caddaaladda bulshada, xuquuqda aadanaha, xorriyadda, akhlaaqda, la dagaallanka kelitalisnimada iyo dib-u-habaynta fikirka Muslimiinta. Wuxuu qoray tobannaan buug oo si weyn looga akhriyo dunida Islaamka, waxaana lagu xusuustaa codkiisii aqooneed ee dheellitirnaa, dhaliilihiisii bulsho iyo siyaasadeed, iyo dadaalkiisii joogtada ahaa ee uu ku difaacayay qiyamka Islaamka.

**Nigel Ashford** waa aqoonyahan iyo qoraa u dhashay Britain, kuna takhasusay cilmiga siyaasadda, xorriyadda shakhsiga iyo mabaadi'da bulshada xorta ah. Wuxuu hore Professor of Politics uga ahaa Staffordshire University, sidoo kalena wuxuu hoggaamiyey mashruuca Principles for a Free Society ee Jarl Hjalmarson Foundation.

Bulshada xorta ahi keliya ma aha wadarta xuquuqaha ay leeyihiin xubnaha iyo qoysaska ay bulshadu ka kooban tahay, ee waa hab maamul (system) is-dhamaystiraya oo leh mabaadi' saldhig ah, kuwaas oo u wada shaqeeya si heer sare ah oo isku dheelli tiran. Nigel Ashford wuxuu tilmaamayaa in xorriyadda qofka, wax-lahaanshaha, ganacsiga xorta ah, sarreynta sharciga iyo bulshada rayidka ahi ay yihiin unugyo isku xiran oo aan la kala saari karin; haddii mid maqnaadana kuwa kale ay saamaynayaan.

Nigel wuxuu leeyahay aragtiyo gurracan oo ku xadgudbaya xorriyadda, kuwaas oo ku dhisan falsafadda liberaaliga ah ee reer Galbeedka, balse wuxuu leeyahay aragtiyo badan oo waafaqsan mabaadi'da la jaanqaadaysa fidrada bani'aadamka iyo kuwa diinteenna suubban ay ina siisay.

Labada kitaab waxay isku waafaqeen, iyagoo kala matalaya aragtida Islaamka iyo tan reer Galbeedka, in qofka bani'aadamka ah aan la dulmin karin. Waxay ka siman yihiin in sharciga hortiisa loo siman yahay, caddaaladda, xorriyadda insaanka, ilaalinta noloshiisa iyo maalkiisa, iyo in la koobo awoodda dowladda ama suldadda si aysan ugu xadgudbin shacabka.

Qaanuunku cidna ma siinayo sad-bursi ama sarreyn gaar ah oo uu kaga duwan yahay dadka kale. Garsoorkuna waa inuu madax-bannaan yahay, waajibna ka saaran yahay xaqiijinta caddaaladda. Xorriyadda fikirka iyo ra'yigu waa mid muhiim ah. Qofkuna wuxuu la xisaabtami karaa cidda awoodda u haysa (dowladda), mana aha inuu si indho la'aan ah ugu hoggaansamo. Ilaalinta noloshiisa, hantidiisa iyo karaamadiisa, iyo diidmada midab-takoorka iyo kali-talisnimadu intuba waa waxyaabaha ay isku waafaqsan yihiin.

Waxay isku khilaafsan yihiin halka laga soo xiganayo xuquuqda. Al-Ghazaali wuxuu kasoo xigtay in Alle karaameeyey insaanka (ولقد كرمنا بني آدم) **"Waxaa xaqiiqo ah in Eebe uu kareemeyey banii'aadanka."** - Al-Israa -70, xuquuqduna leedahay asaas diimeed oo sharci iyo akhlaaq ku dhisan, taas oo aan isbeddeli karin. Halka Ashford uu kasoo xigtay in xuquuqdu tahay akhlaaq caalami ah, kuna tiirsan xuquuq dabiici ah, qofkuna yahay sidaha xaqa aasaasiga ah. Macnaheedu waa in aanay diin salka ku hayn, ee qofka laftiisu leeyahay. Sida dabeecadaha iyo shuruucdu isu beddelaanna way raacaysaa, oo haddii sharcigu xaq u siiyo wax diinta ka hor imanaya, taas ayuu raacayaa.

Al-Ghazaali wuxuu arkaa in qofku wax hantiyi karo, ayna sharci tahay, laakiin ay leedahay masuuliyad bulsho. Maalku waa inuusan noqon awood dhiig-miirasho iyo keli-koob ah (suuqa oo cid keli ahi gacanta ku hayso), taas oo dulmi ku ah fuqarada. Wuxuu sidoo kale arkaa in bulshada iyo dowladduba ay kaalin ku leeyihiin caawinta kuwa nugul iyo ilaalinta karaamada qofka.

Ashford wuxuu diidayaa sinnaanta bulshada, wuxuuna arkaa in caddaaladda bulshada dhexdeeda ahi ay tahay habab iyo qawaaniin oo keliya, ayna ahayn natiijo ay tahay in la gaaro. Wuxuu leeyahay kuwa hodanka ahi hodan ha ahaadeen, kuwa faqriga ahna haddii ay

sidaas ahaadaan wax ku jaban ma jiraan(Capitalism – Hantigoosad). Wuxuu kaloo ka gaabsanayaa in baahiyaha dhaqaale iyo kuwa bulsho ay yihiin xuquuq dadku leeyihiin oo aan xadidnayn.

Hordhacaas kooban ayaan uga gudbaynaa, akhristuhuna wuu sii tixraaci karaa buugaagta ay kala qoreen, waana mid uu faham fiican kaga qaadanayo xorriyadda iyo xuquuqda qofka. Balse waxaan rabnaa inaan xoogga ku saarno qormadan kooban tilmaamaha xorriyadda ee bulshadeenna aan la rabno, iyadoo aan isku dari doonno waxa diinteenna inoo jidaysay iyo murtida ay dhigteen ummaduhu, kana tagayna wixii khilaafsan diinteenna iyo dhaqankeenna suubban. Waana sababta aan hordhaca ugu bilaabay labada qoraa ee kala ah Al-Ghazaali iyo Ashford, kuwaas oo kala matalaya Islaamka iyo Cilmaaniyadda.

Islaamku isaga ayaa uga horreeyey qarniyo badan Qaramada Midoobay markii ay ku dhawaaqday Xuquuqda Aadanaha Paris, 10-kii December 1948. Qur'aanka iyo Sunnaddu waxay dhigeen oo sharciyeeyeen xuquuqda insaanka 1400 sano ka hor. Al-Ghazaali ma kala saarayo qaanuunka iyo damiirka qofka, xaqa iyo akhlaaqda. Qofku wuu ka baxsan karaa sharciga, laakiin waxaa la xisaabtamaya Alle. Waana midda aynu kaga duwan nahay reer Galbeedka, kuwaas oo aan mar walba isku si ugu dhaqmin mabaadi'da ay sheegtaan. Tusaale ahaan, gabood-fallada ka dhacay Gaza waxay dhalinayaan su'aalo waaweyn oo ku saabsan sida xuquuqda aadanaha loogu dhaqmo si isku mid ah.

Ma jiro xaq aan masuuliyad lahayn. Qofku xaq ayuu leeyahay, haddana wuxuu masuul ka yahay xaqa kuwa kale. Al-Ghazaali wuxuu adkaynayaa in caddaaladda, karaamada iyo dhowrista nolosha iyo maalku aysan ahayn keliya xaq uu Muslimku leeyahay, balse sidoo kale ay ku jiraan kuwa aan Muslimka ahayn. Inkasta oo ay ku kala duwanaan karaan axkaamta iyo faahfaahinta, haddana xuquuqda iyo karaamadu waa kuwo bani'aadamku ka siman yahay.

Dastuurkeenna Federaalka Soomaaliyeed wuxuu Cutubka 2aad ku qeexayaa Xuquuqda Aasaasiga ah iyo Waajibaadka Muwaadinka. Isagoo waafaqsan sharciga Islaamka, wuxuu dhigayaa qodobbo gaaraya 31 qodob, kuwaas oo ka hadlaya karaamada aadanaha, sinnaanta, xaqa nolosha, xorriyadda qofka, mamnuucidda jirdilka iyo addoonsiga, xorriyadda fikirka, xorriyadda hadalka, xurmada hoyga, bannaanbaxa, isu-socodka, siyaasadda, shaqada, hantida, caafimaadka, waxbarashada, carruurta, helidda macluumaadka iyo xaqa garsoor caddaalad ah.

Waxaa su'aal noqonaysa: qofka muwaadinka ah iyo bulshada Soomaaliyeed ma ku naaloonayaan xuquuqdaas, mise weli waxaa jira dulmi iyo xadgudubyo ka jira dalkeenna?

Haddaba, si qofka iyo bulshaduba xuquuq u helaan, waxaa lama huraan ah in tilmaamahan laga helo:

- Dhowrista karaamada insaanka iyo ixtiraamka xuquuqdiisa.
- In loo sinnaado sharciga iyadoo aan la kala sarreyn.
- Sharcigu waa inuu ka sarreeyaa madax iyo shacab labadaba.
- Xorriyadda aragtida iyo ka qaybgalka siyaasadda.
- Xaqa ku noolaanshaha amniga iyo diidista jirdilka iyo xadgudubka.
- Garsoorku waa inuu madax-bannaanaado, xukunkuna noqdo mid caddaalad ku dhisan.
- Qof walba oo dulman wuu dacwoon karaa, wuuna la xisaabtami karaa qofkii dhibta u geystay.
- Ilaalinta asturnaanta, hantida iyo xorriyadda isu-socodka.
- Hirgelinta caddaaladda bulshada ee waxbarashada, caafimaadka iyo shaqada.
- Ilaalinta dadka nugul iyo dadka laga tirada badan yahay.
- In xorriyadda lagu xiro masuuliyad, lagana fogaado waxyeellaynta xuquuqda dadka kale.

Haddaba, bulshadu intaas kuma gaari karto iyadoo weli ku dhisan qaabka hadda jira ee qabiillo iyo kala-qoqob bulsheed, taas oo fursad siisay dabaqadda siyaasadeed ee xukunka isku wareejisa inay ku tuntaan xuquuqda shacabka, kana hortagaan wax kasta oo bulshada midayn kara. Tilmaamahan waxa lagu dhaqangelin karaa oo keliya bulsho isku duuban, leh cod mideysan oo magaceeda ku hadla, kuna salaysan qiyam iyo mabaadi' aan ku xirnayn dano iyo maslaxado siyaasadeed oo gaaban.

# TIXRAAC


1. حقوق الإنسان بين تعاليم الإسلام وإعلان الأمم المتحدة، محمد العزالي
2. Principles for a Free Society - Nigel Ashford
3. https://mugtama.com/articles/الفقيه_الداعية_المجد_د_الشيخ_محمد_الغزالي_1
4. Studnetsforliberty.org
5. Dastuurka Kumeel Gaarka ah ee Dowladd Federaalk Soomaaliya – 2012.

# YAA HORTAAGAN DAWLADNIMO KA HANA-QAADDA DHULKA-UDUGGA (PUNTLAND) QAYBTA 1-AAD

## TAXANAHA WIXII HIRGALAY IYO WIXII LAGU HUNGOOBAY



Qareen Maxamed Yuusuf Cali



**Xigashada Sawirka**: AI

Qormooyinka taxanaha ah waxaan ku soo gudbinayaa, kuna sawirayaa, xaaladaha dhaqan-dhaqaale iyo siyaasadeed ee Puntland, guurguurka awoodda iyo hoggaanka aan mar walba la mahadin, iyo sidoo kale dadka iyo dabeecadahooda. Waxaan sidoo kale ku eegayaa halka ay Puntland maanta taagan tahay, halka ay u jihaysan karto, iyo waddada loo mari karo dhismaha dowladnimo waarta oo ka hanaqaadda Puntland.

# DAWLADNIMO:

Dawladnimadu waxay leedahay meel laga ambaqaado, balse ma laha dhammaad; waa hannaan joogto ah oo ku dhisan dhisid, horumarin iyo isbeddel. Hay'adaha dawladdu waa halbeegga lagu cabbiro korriimada, hufnaanta iyo waxqabadka dawladnimo, mana aha waxqabad mar keliya la higsado dabadeedna lagu qanco.

Sidaa awgeed, bandhiggan kooban waxa gundhig u ah ARAGTIDA HORUSOCODKA IYO KORRIIMADA DAWLADNIMO, oo ku salaysan horumarinta dad iyo dawladba, iyadoo si joogto ah dib loogu eegayo siyaasadaha, qorshayaasha iyo istiraatiijiyadaha dawladnimo ee bulsho leedahay.

Dawladnimadu waa sarraynta sharciga (Rule of Law), ku dhaqanka xeerarka iyo nidaamyada, iyo raacidda hagayaasha ay dadku samaysteen, kuna heshiiyeen in lagu hago noloshooda iyo deegaankooda. Dawladnimadu waxay aasaas iyo tiirba u tahay dadka; sidaas darteed, korriimada, wacyiga iyo ilbaxnimada bulshada ayaa ah udub-dhexaadka hirgelin kara ama ragaadin kara dawladnimada.

# HINDISAYAASHII AASAASAYAASHA PUNTLAND:

Aasaasayaashii Dawlad-goboleedka Puntland waxay, sida laga dheehan karo Axdigii/Jaartarkii lagu heshiiyey 15-kii May 1998, niyadda ku hayeen in deegaannada Waqooyi-bari Soomaaliya laga hirgeliyo maamul awood u leh inuu dib u dhiso oo bixiyo adeegyo iyo hawlo ay qaban jirtay dawladdii dhexe ee burburtay sannadkii 1991. Hindisahaas waxa udub-dhexaad u ahaa sugidda amniga, xasilloonida bulshada, hirgelinta kala dambaynta iyo ku dhaqanka sharciga, ururinta dakhliga iyo canshuuraha, iyo horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha, sida jidadka, garoomada diyaaradaha iyo dekedaha. Sidoo kale, waxaa ka mid ahaa bixinta adeegyada aasaasiga ah ee bulshada, gaar ahaan caafimaadka, waxbarashada, biyaha iyo tamarta.

**Ararta Axdiga Puntland waxay ku bilaabmaysaa sidan:**

"WAXAA NAGA GO'AAN ah inaan waa cusub ambaqaadno, si aan uga sabata-baxno masiibadii iyo dhaxalkii xanuunka iyo arammida lahaa oo ay sababeen Diktatooriyaddii dhacday, dagaalladii sokeeye oo ka sii xumaa iyo ku guuldarraysiga waan-waanta dib-u-heshiisiinta qaran;

WAXAAN KU MINTIDAYNAA yagleelidda hannaan cusub oo horseedi kara Dawlad Soomaaliyeed oo Federaal ah, kuna dhisan nabad iyo caddaalad; ..."

Qoraalkani waxa uu xambaarsan yahay aragti cad iyo hindise dawladnimo, oo ka tarjumaya himilo ku wajahan dhismaha nidaam cusub oo ku salaysan nabad, caddaalad iyo federaalnimo, iyadoo loo danaynayo dadka Puntland iyo guud ahaan shacabka Soomaaliyeed.

**Puntland oo Alle u xilqariyey dadkeeduna isu xilqaamay:**

Puntland waxay ku qotontaa labo seddexan oo is dheelitira awoodda, siyaasiga iyo mucaaradka, dawladda iyo shacabka, amniga iyo colaadda, waxayna kala yihiin:

SADDEXDA HAY'ADOOD XILKA LOO IDMADAY OO KALA AH XUKUUMADDA, BAARLAMAANKA IYO GARSOORKA

Vs

SADDEXDA AWOOD-BULSHO OO IS XILQAAMAY ISIMO, CULIMO IYO GANACSATO

Labadaan isbarbaryaalla ee lagu ilaalinaayey dawladnimada, wadajirka dhul iyo dad iyo xallinta khilaafaadka, waxay u shaqaynaayeen kali kali, waa marka qayb kasta shaqadeeda ay si caadi u fulinayso, koox koox marka ay dhacdo xaalad ama timaado ugub ah oo xal loo dhan yahay u baahata. Haddaba innagoo sheegi doonna si faahfaahsan, waxaa isweydiin mudan labada seddexan ma isula hana qaadeen si siman mise waa kala dheereeyeen?

# TAXANAHA DAWLADNIMADA PUNTLAND

Puntland waxay soo martay marxalado kala duwan oo dhanka dastuurka, xukuumadaha, baarlamaanka, garsoorka, qorsheyaasha horumarineed iyo shirarka wadatashiga ah. Taxanaha dawladnimadu wuxuu ka kooban yahay:

- **HAL AXDI IYO LABA DASTUUR:** Axdigii 1998, Dastuurkii 2005 iyo Dastuurkii 2012 la ansixiyey. Mudadaas waxaa sidoo kale jiray wax-ka-beddello lagu sameeyey Dastuurka, oo ay ka mid yihiin kuwii 2023 iyo 2026.
- **LIX XUKUUMADOOD OO DHAMMAADAY:** 1998–2004, 2004–2005, 2005–2009, 2009–2014, 2014–2019 iyo 2019–2024.

  2024–2029: Xukuumadda toddobaad oo weli xilkeedu socdo, haddii aanu shacabku xilka ka qaadin.
- **SHAN GOLE BAARLAMAAN OO DHAMMAADAY:** 1998–2004, 2004–2008, 2008–2013, 2013–2018 iyo 2018–2023.

  2023–2028: Baarlamaanka lixaad oo hadda jira, haddii uu ka badbaado mooshinnada joogtada ah.
- **LIX GOLE GARSOOR OO DHAMMAADAY:** 1998–2002, 2003–2005, 2005–2007, 2007–2016 iyo 2016–2023.
- 2023–illaa hadda: Golaha Garsoorka toddobaad oo weli xilka haya.
- **SHAN QORSHE HORUMARINEED:** 2007–2011, 2014–2018, 2017–2019, 2020–2024 iyo 2026–2030.
- **AFAR SHIRWAYNE OO WADATASHI AH:** Qardho (1994), Garoowe (1998), Gaalkacyo (2015) iyo Garoowe (Maarso 2020).

# KORRIINKA DHISMAHA HAY'ADAHA DAWLADDA

Sannadkii 1998, waxaa unkamay haykalka aasaasiga ah ee dawladnimada Puntland, kaas oo ka koobnaa Xukuumadda, Baarlamaanka iyo Garsoorka.

Waxaa xusid mudan in hay'adaha dawladeed ee maanta jira aysan dhammaantood hal mar wada samaysmin. Halkii, hay'ad kastaa waxay ku timid baahi soo korortay iyo hawl dawladnimo oo u baahatay hay'ad gaar ah oo fulisa. Sidaas awgeed, dhismaha hay'adaha Puntland wuxuu ahaa hannaan tartiib-tartiib ah oo ku salaysnaa baahida, duruufaha iyo koboca dawladnimada.

# GOLAHA XUKUUMADDA

1. Golaha xukuumadda 1998-dii wadartooda waa 15 xubnood: 9 wasaaradood oo lagu aasaasay iyo afar wasiir ku xigeen oo gadaal laga magacaabay, Madaxweyne iyo kuxigeen;
2. Golaha xukuumadda 2018kii wadartooda waa 56 xubnood: 19 wasaaradood, 35 wasiir ku-xigeen iyo wasiiru-dawle, Madaxweyne iyo Madaxwayne Ku-xigeen;
3. Golaha xukuumadda 2026da wadartooda waa 66 xubnood: 21 wasaaradood, 43 wasiir ku-xigeen iyo wasiiru-dawle, Madaxweyne iyo Madaxwayne Ku-xigeen;

# SHAQAALAHA DAWLADDA

4. Shaqaalaha dawladda 1998dii waxay ahaayeen 700 oo booliska ku jireen.
5. Shaqaalaha dawladda 2018-kii, tiradooda waxaa lagu qiyaasay 7,500 oo shaqaale rayid ah, halka boolisku uu ahaa 3,800 oo askari.

# MIISAANIYADDA

6. Miisaaniyadda 1998 waxay ahayd (180 milyan bishii) 8.4 billion Sh. Soomaali. Xigasho shaqaalihii u horreeyey wasarada maaliyadda. (1USD = 8,500 Shilling).
7. Miisaaniyadda 2026 waa (11milyan oo doolar bishii), 132 milyan doolar sanad, xigasho buuga miisaaniyadda 2026 (Dhaqaalaha dakhliga ee dawladda Puntland iyo kharshka ku baxa adeegga iyo mushaaraadka marka laysu fiiriyo ma isku dheelli tiranyihiiin mise waxaa jira goldoloole qorshayn dhaqaale? Canshuuraha si sax ah ma loo ururiyaa, khasnadda dawladda malagu shubaa, dawladda dadka ma ugu adeegtaa dakhliga canshuurta mise dane kale iyo fadlan bay ku baxaan? dood baa halkaa ka furan!).

# DHULKA: GOBOLADDA IYO DEGMOOYINKA

Puntland waxaa lagu aasaasay 5 gobol iyo hal degmo (Bari, Sanaag, Nugaal, Sool. Mudug iyo Degmada Buuhoodle). Waxaa samaysmay maamul la magac baxay Maamul Goboleedka Waqooyi Bari Soomaaliya oo la go'ay qaar ka mid ah gobolladii iyo degmooyinkii Puntland lagu aasaasay (Sool. Ceyn, Sanaag iyo Haylaan)

## DOORASHADA GOLAYAASHA DEGMOOYINKA

Markii ugu horreysey ka gadaal 24 sano aasaaskii Puntland ayaa dawladda Puntland u talaabsatay inay hirgeliso doorashada tooska ah ee dadku ku dooranayaan xubnaha ku metelaya Golaha Deegaanka ee 36 Degmo oo ka tirsan Puntland. Doorashada oo ku bilaabatay tijaabo ayaa 3 degmo laga qabtay 2021, 30 degmana 2023, halka 3 degmo ee harsanaa laga qabtay 2024. Tallaabadan ayaa waxay kow ka tahay in dadka loo rumeeyo riyadii lagu asteeyey axdiga lagu aasaasay Puntland 1998dii.

Milicsi kooban: Xaaladda Amni, Dhaqaale, Horumar, Arrimaha Bulshada iyo Xiriirka Dawladda iyo Shacabka, Xiriirka Puntland iyo Dawladda Federaalka (Qalfoof aan Qar lahayn)

1. **Amniga iyo Nabadgelyada:** Fursadda nabagelyada ka jirta Puntland waxay ku dhisan tahay dadka oo nabadda jecel, isimmada, culimada iyo ganacsatada oo aan dawladda ku hallayn amniga deegaannada Puntland. Haykalka hay'adaha amniga oo dhisan, laakiin aan u adeegin hannaan kala danbayn, isla-xisaabtan iyo isa-sixid dawladnimo. Ciidanka oo beelaysan iyo ciidanka caagleysiga oo badan; sababtuna ay tahay Madaxweyne kasta oo la doorto oo dhisa ciidan beeshiisa ah. Hubka ku jira gacanta shacabka oo si ula kac ah madaxweyne kasta u dhiirrigeliyo beeleysiga. Aragagixisada nabad diidka buuraha Golis (Calmadow iyo Calmiskeed). Isku-dhacyada xuduudaha ee Puntland-Somaliland, Puntland-Galmudug Puntland-Northeastern. Xiriirka bulshada iyo ciidammada amniga oo liita, halka laga sugaayey ciidan amniga shacabka ka shaqeeya oo ay u bedeleen ciidan shacabka ka shaqaysta.
2. **Dhaqaalaha iyo Ganacsiga:** Dhaqaalaha Dawladda Puntland wuxuu ku tiirsan yahay Canshuuraha iyo Deeqaha la helo. Nasiib darro waxaa hareeyey Musuq-maasuq baahsan dakhlliga (canshuurta iyo deeqaha gudaha iyo caalamgia). Hab-maamullka dhaqaalaha iyo hantida dawladda oo aan lahayn isla xisaabtan iyo raad-raac. Ganacsiga iyo dhaqaalaha bulshada oo aan fadhin/xasilloonayn iyo sida aysan u jirin siyaasado iyo bankiyo ganacsiga duljoogteeya hagana. Abaaraha soo noqnoqda iyo nabaad-guurka deegaanka (mid dabiici ah iyo mid xaalufin iyo jariifba keenaan), Puntland oo aan lahayn bangi, hannaan lagu nidaamiyo sarrifka lacagaha maxalliga iyo qalaad ee ganacsigu ku tiirsan yahay. Amniga magaalooyinka waaweyn oo saameeyey nolosha ganacsatada maxalliga iyo kuwa ka iman jiray koonfurta iyo galbeedka Soomaaliya (takoorka iyo xarriga dadka koonfurta iyo galbeedka Soomaaliya ka yimaada).
3. **Kaabayaasha Dhaqaalaha Kaabayaasha dhaqaale ee Puntland ku soo baraartey waxay kala yihiin:** Dekedda Boosaaso iyo Jidka isku xira Boosaaso-Gaalkacyo, Laascaano-Garoowe. Nasiib-daro dekedda baaxadeeda oo kooban iyo iyadoo wax horumar ah aan lagu samayn waxay lumisay kaalintii ay Dekedaha Soomaaliya kaga jirtay.

   Talaabada xukuumadda ee ay gacanta ugu gelisay dekedda Boosaaso shirkadda DP-WORLD ayaanan la mahadin, maantana dekedda Boosaaso maraakiib iska daayee doonyo ayaanan ku xirmi karin (tolow qorshaha dawladda ma wuxuu ahaa xiridda dekedda Boosaaso? Mise in dadka la barakiciyo ayaa la rabaa?)
4. **Arrimaha Bulshada:** Adeegyada caafimaad, waxbarasho, dhalinyaradda iyo haweenka intaba horumar baa laga sameeyey 28kii sano ee la soo dhaafay, hirgelintooda waxaa ka danbeeya awoodda shacabka. Adeegga caafimaad ee Puntland aad buu u hooseeyaa, waxaana la wada qirsan yahay in safarka ugu badan ee dibadda shacabku u aadaan in uu yahay safar caafimaad (Hargeysa, Boorame, Muqdisho, Hindiya, Turkiga, Masar, Kenya iyo Itoobiya). Waxbarashada 95% waxaa gacanta ku haya shacabka, dawladdu wax ay ku darsatay ma jirto, mana u qorsheysna inay wax ku darto ama ku biiriso. Siyaasado iyo qorshe waraaqo ku qoran mooyee, dawladda Puntland marna ma fulin barnaamijyo khasnadda dawladda laga kaalmeeyey oo ku jiheysan horumarinta dhalinyarada iyo haweenka.

5. **Xiriirka Dawladda Puntland iyo Federalka iyo Maamul Goboleedyada:** Waxaa caad saarnayn siyaasadda gurracan ee maamulka Puntland laga bilaabo xukuumaaddii Cabdiraxmaan Faroole ilaa tan hada joogta in Puntland ay noqotay mid saamayn aan ku lahayn Dawladda Federaalka hay'adaheeda kala duwan, jihada siyaasadda Soomaaliya u socoto iyo talada dalka guud ahaan. Waxaa lumay saamigii shacabka Puntland ay ka heli jireen deeqaha caalamiga iyo qoondooyinka Dawladda Federaalka sabatuna ay tahay siyaasadda maamullada taxanaha ahaa ee Puntland ee fadhiidka ah, kuna salaysan "INYAW".

## GUUDMAR CAQABADAHA HORUSOCODKA PUNTLAND

- Maamulkii ugu horreeyey oo qaatay waddo qalloocan; xilli kororsi dhiig ku daatay oo keenay in dib loo beelo-beeloobo, balse laga gudbay.
- In Jaartarkii (Axdigii) loo beddelo dastuur dhamaystiran qaadatay 14 sano,
- Puntland oo lumisey deegaanno ka mid ah Puntland, sida gobolka Sool, Sanaag iyo Buuhoodle.
- Hindisihii nidaamka axsaabta badan oo aan si joogta ah loo hirgelin.
- Khilaafyo gudaha (leh iska hor-imaad hubaysan) iyo dagaallo xuduudaha Galmudug iyo Somaliland.
- Khilaaf Joogta ah xilliga doorashada/ xulista xubnaha Golaha Wakiillada, gaar ahaan hannaanka magacaabidda guddiga khilaafaadka. Sidoo kale waxaa ugub ah boobka xulista xildhibaannada federaalka ee madaxda Puntland caadaysteen.
- Xukuumadaha oo aan mudnaanta siinin maamul-wanaag, musuq la dirir iyo daahfurnaan hay'adaha dawladda

## WAXYAABAHA AAN LAGU GUULEYSAN

- Xukuumadaha soo maray Puntland oo dhan oo aan samaynin siyaasad iyo aragti horumarineed oo shacabka iyo dawladda ku wada socdaan, leh wadatashi iyo xog-wadaag.
- Maxkamadda dastuuriga oo aan si hufan oo madaxbannaan loo dhisin.
- Amniga magaalooyinka waaweyn oo aan gaarin heerkii loo gudbi lahaa horumar iyo maalgashi shisheeye.
- Xukuumadaha isdaba yaallay oo aan wadatashi kala samaynin bulshada (xeel-dheerayaal) arimaha masiiriga ee Puntland walow dastuurka la farayo.
- Hubka oo aan bulshada laga ururin, taa baddalkeeda Puntland waxay fasaxday in hubka si beelaysan loola soo dago.
- Adeegyada aasaasiga oo aan la gaynin qaybo ka mid ah deegaannada gaari-waaga ee laamiga ka leexsan
- Bulshada degen xeebaha oo aan helin wax adeeg horumarineed, sida waddooyinka, amniga, tamarta, waxbarashada iyo caafimaadka.

## DHIBAATOOYINKA BULSHADA

Dhibaatooyinka bulsho ee jiray mudadan waxaa ka mid ah:

- Shaqo la'aan; dhalintu ma helaan jihayn iyo hirgelin barnaamijyo iyo siyaasado shaqo abuur lagu beegsanayo:
  - Dhallinta waxbaratay dalka gudahiisa iyo kuwa dibada ka soo yimi
  - Dhallinta ka soo barakacday gobollada kale ee aan Puntland ka tirsanayn
  - Dhallinta ka soo gashay miyiga lagu cayroobay
  - Dhallinta badda ka jillaaban jirtay ee jariifku barakiciyey
- Tahriibta; dhalinta wax baratay rag iyo dumar oo ahaa labeenta bulshada oo ku idlaanaya badaha guunkooda.
- Burcad badeedda; dhammaan xeebaha Puntland, balse hadda soo laba kacleeyay.
- Dhallinyarada oo si xun uga faa'iideystaan ururrada argagixisada iyo ciidan beelaynta.
- Qaadka oo burburiyey dhaqaalaha iyo qoyska in badan oo reer Puntland ah, welina aan qorshe laga samayn xakamayntiisa.
- Qabyaaladda iyo faquuqa/takoorka dadka nugul ama la tunjilicsado oo aan dawladdu wax tallaabo ka qaadin.

La soco qaybta 2-aad

# CULIMADA CAANKA AH EE DARIIQADA QAADIRIYADDA EE BANAADIR



Dr. Cabdiraxmaan Baadiyow



Maqaalkan waxa uu u hibeysan yahay culimada sharafta leh ee Islaamka ee ka tirsanaa dariiqada Qaadiriyadda, kana soo jeeday gobolka Banaadir. Waa qayb ka mid ah taxanaheenna taariikh-nololeedyada gaagaaban ee iftiiminaya nolosha iyo waxqabadka haldoorka Soomaaliyeed. Taxanahan, wuxuu iftiiminayaa kaalintii weynayd ee culimadani ku lahaayeen qaabaynta nolosha diineed, dhaqameed, iyo bulsho ee Soomaaliya. Daacadnimadooda iyo adeeggoodii ay u hayeen dariiqada Qaadiriyadda waxay bulshada uga tageen dhaxal waara. Maqaalkani wuxuu ujeedkiisu yahay inuu maamuuso dhaxalkooda, isla markaana jiilasha soo socda ku dhiirrigeliyo guulahoodii muuqday iyo saamayntoodii sii jirta. Dariiqada Suufiyada ee Qaadiriyada waxaa magaalada Baqdaad ka aasaasay Shiikh Cabdulqaadir Al-Jiilaani (oo geeriyooday sannadkii 1166). Waxay gaadhay gobollada galbeed iyo waqooyi ee dhulka Soomaaliyeed horraantii qarnigii 16aad, iyada oo uu keenay Abuu Bakar bin Cabdullaahi Al-Caydaruus (geeriyooday 1502), oo ka soo jeeday Xadra-mawt ee dalka Yemen. Bilowgii, dariiqada Qaadiriyadu waxay si weyn uga hanaqaadday magaalada taariikhiga ah ee Harar, oo ahayd caasimadda Islaamka ee Geeska Afrika. Halkaas ayay uga sii fidday magaalada Muqdisho iyo deegaannada ku hareeraysan, iyada oo ay door muhiim ah ka qaateen culumada kasoo jeeda Banaadir. Hase yeeshee, waqtiga saxda ah iyo habkii ay uga sii faaftay qaybaha kale ee Soomaaliya ilaa qarnigii 18aad weli si cad looma hayo.

Dhaqanka afka ah (xogta iyo xusuusta laga dhaxlo jiilba jiil) wuxuu tilmaamayaa in Shiikh Abikar Mahdar Axmed Al-Kasaaiy uu ahaa caalimkii ugu horreeyay ee si weyn loo yaqaanay ee dariiqada Qaadiriyadda ka soo baxay Banaadir. Waxaa loo bixiyay magaca Shiikh Al-Shuyuukh, maadaama uu macallin iyo hage u ahaa culimo badan oo caan ka noqday dhulka Soomaaliyeed, sida Shiikh Cabdiraxmaan Al-Suufi, Shiikh Axmed Xaaji Mahdi, iyo Shiikh Cabdiraxmaan Al-Zaylacii. Inkastoo xogta iyo diiwaannada taariikhiga ah ee noloshiisa aan si wanaagsan loo kaydin, magaalada Warsheekh waxaa ku yaalla masaajid qadiimi ah oo ay ku xardhan tahay qoraal tilmaamaya in dhalashadiisa iyo geeridiisu ahaayeen 1230–1293 Hijri (1816–1876 Miilaadi), halka qol ku dheggan masaajidka lagu xuso inuu yahay qabrigiisa. Waxaa la ogyahay in Shiikh Abikar uu ka guuray Muqdisho sababo la xiriira diidmada uu ka qabay ciyaarihii iyo caadooyinkii anshax-darrada ahaa ee loo yaqaanay "Minyaas", kuwaas oo xilligaas ku baahsanaa magaalada. Wuxuu markii hore dhowr jeer u guuray deegaanka Nimow, oo ku dhow Muqdisho, ka hor intii uusan ugu dambayn degin Warsheekh. Dhaqamadaas waxay ahaayeen arrin culus oo ay culimadu isku dayeen inay joojiyaan, hase yeeshee dadaalladooda ma aysan guulaysan ilaa uu yimid Shiikh Uways Al-Barawi, kaas oo ugu dambayn ku guulaystay inuu meesha ka saaro caadooyinkaas isaga oo adeegsanaya xikmaddiisa, wacdigiisa, iyo saamayntiisa diineed.

Shiikh Cabdiraxmaan bin Cabdullaahi Al-Suufi (1829–1904) wuxuu ka mid ahaa culimada ugu caansan ee Banaadir. Waxa uu ka baxay xaruntii waxbarashada Islaamiga ahayd ee uu Shiikh Abikar Mahdar ka aasaasay Warsheekh, halkaas oo uu ku bartay culuumta diinta, kadibna uu ku biiray dariiqooyinka Qaadiriyadda iyo Axmadiyadda. Shiikh Cabdiraxmaan Al-Suufi wuxuu bayco (axdi daacadnimo) la galay Shiikh Uways Al-Barawi kaddib markii uu Shiikh Uways xalliyay dhibaatadii la xiriirtay ciyaarihii iyo dhaqamadii anshax-darrada ahaa ee ka jiray Muqdisho. Geeridii Shiikh Abikar Mahdar kaddib, Shiikh Cabdiraxmaan Al-Suufi ayaa beddelay oo sii waday kaalintiisii, isaga oo noqday caalimkii ugu magaca iyo saamaynta badnaa magaalada Muqdisho, kaalin weyna ku lahaa faafinta cilmiga Islaamka iyo hanuuninta bulshada.

Caalim kale oo caan ahaa oo ka tirsanaa dariiqada Qaadiriyadda ee Banaadir wuxuu ahaa Shiikh Axmed Xaaji Mahdi (geeriyooday 1900). Shiikh Axmed Xaaji Mahdi wuxuu ahaa mucaarad adag oo ka soo horjeeday gumaysigii Talyaaniga, mana uusan aqbali karin inuu ku noolaado Muqdisho xilligii taliskii gumaysiga. Sidaas darteed, wuxuu u guuray tuulada Nimow oo qiyaastii 20 kiiloomitir koonfur ka xigta Muqdisho, halkaas oo uu ka aasaasay xarun waxbarasho oo Islaami ah oo uu ugu magac daray Daar Al-Hijra. Hase yeeshee, kaddib weerarkii Soomaalida Lafoole ku qaadeen ciidamadii Talyaaniga ee u socdaalayay gudaha dalka sannadkii 1896-dii, kaas oo sababay dhimashada 83 askari iyo saraakiil Talyaani ah, Talyaanigu isagoo careysan ayuu duqeeyay oo burburiyay tuulada Nimow. Sidaas darteed, Shiikh Axmed Xaaji Mahdi wuxuu u guuray Dai Suufi oo ku taalla dhulka gudaha ah, kaddib markii Talyaanigu ku eedeeyay inuu dhiirrigeliyay weerarkii Lafoole, isaga oo adeegsanaya saamayntiisa si uu qabaa'ilka kala duwan ugu boorriyo inay iska caabiyaan gumaysiga Talyaaniga. Shiikh Axmed wuxuu sidoo kale dhowr sano ku noolaa Baramaale oo u dhow

Rage-Eele, qiyaastii 100 kiiloomitir waqooyi kaga beegan Muqdisho, halkaas oo uu ka aasaasay xarun kale oo waxbarasho. Baramaale waxay noqotay xarun caan ku ah barashada culuumta Islaamka, waxaana halkaas Qur'aanka ku xifdiyay arday badan oo ka kala yimid deegaannada ku hareeraysan. Markii xaaladdu deggenaatay, Shiikh Axmed Xaaji Mahdi wuxuu xaruntiisii waxbarashada ka hirgeliyay Warabale, oo ku taalla inta u dhexeysa Muqdisho iyo Afgooye. Ardaydiisii waxaa ka mid ahaa Shiikh Ibraahim Cali Gacal (1887–1965), oo caan ku ahaa barnaamijyadiisa wacdiga Islaamiga ah ee nidaamsan. Shiikh Ibraahim wuxuu ahaa mid ka mid ah ardaydii ugu wanaagsanaa ee Shiikh Axmed Xaaji Mahdi, wuxuuna markii dambe aasaasay xarun waxbarasho oo ku taal Garasbaaleey (oo maanta ka tirsan degmooyinka Muqdisho), taas oo shaqaynaysay ku dhowaad 50 sano.

Magaca dariiqada Qaadiriyadda ee koonfurta Soomaaliya wuxuu si weyn ugu xiran yahay Shiikh Uways Axmed Al-Barawi (1847–1909), kaas oo aasaasay laanta Uwaysiyadda ee dariiqada Qaadiriyadda. Waxa uu ku dhashay magaalada Baraawe, wuxuuna ka mid ahaa culimadii iyo murshidiintii (hanuuniyayaashii ruuxiga ahaa) ugu caansanaa. Waxa uu cilmiga ka bartay Shiikh Maxamed Zayni Al-Shaashi iyo Shiikh Maxamed Jannaay Al-Bahluul. Shiikh Al-Bahluul ayaa kula taliyay inuu u safro xarunta ugu weyn ee dariiqada Qaadiriyadda ee Baqdaad. Kaddib markii uu gutay waajibaadka Xajka, Shiikh Uways Al-Barawi wuxuu u sii gudbay Baqdaad, halkaas oo uu ka helay ijaza (ruqsadda cilmiga iyo hoggaaminta dariiqada) iyo khirqa (khamiiska astaan u ah xilka ruuxiga ah) ee Qaadiriyadda, isagoo ka qaatay Shiikh Mustafa bin Salmaan Al-Kaylaani, oo ahaa hoggaamiyaha dariiqada. Shiikh Mustafa wuxuu markaas Shiikh Uways u xilsaaray inuu faafiyo dariiqada Qaadiriyadda ee Geeska Afrika. Markii uu sannadkii 1882 dib ugu soo laabanayay Muqdisho, wuxuu sii maray xarunta Qaadiriyadda ee Qulunqul, halkaas oo uu kula kulmay Shiikh Cabdiraxmaan Al-Zaylacii, kana helay ijazo sharafeed. Shiikh Cabdiraxmaan Al-Cayli, oo ahaa qoraa taariikh-nololeedyo caan ah, wuxuu xusay in Shiikh Uways uu lahaa ilaa 500 oo xerta ah, kuwaas oo u sahliyay inuu xiriir la yeesho dad saamayn iyo maalba ku lahaa bulshada. Al-Cayli wuxuu magacyada 150 ka mid ah xertan si gaar ah u diiwaangeliyay. Shiikh Uways Al-Barawi wuxuu ahaa hoggaamiye ruuxi ah oo saameyntiisa gaarsiiyay dhammaan qaybaha bulshada, isaga oo soo jiitay dadka dabaqadaha kala duwan leh, sida addoomaha, ganacsatada, ragga, haweenka, iyo carruurta.

Faafitaanka dariiqada Qaadiriyadda ee laanta Uwaysiyadda kuma ekaan Soomaaliya oo keliya, balse waxay ku fiday dalal kale oo ku yaalla Bariga Afrika sida Kenya, Tansaaniya, Uganda, Mozambique, iyo Malawi. Shiikh Uways wuxuu xiriir dhow la lahaa Suldaankii Zanzibar, Barqash bin Saciid, kaas oo noqday mid ka mid ah xertiisii firfircoonayd, kana qayb qaatay faafinta dariiqada Qaadiriyadda ee magaalooyinka xeebaha Bariga Afrika. Xertii caanka ahayd ee Shiikh Uways ku lahaa Soomaaliya waxaa ka mid ahaa Shiikh Faraaj (geeriyooday 1925), oo loo yaqaanay "Suufi Barko", kaas oo noqday qofkii ugu horreeyay ee la wareega hoggaanka dariiqada kaddib geeridii Sheekh Uways. Waxaa sidoo kale ka mid ahaa Shiikh Qaasim Muxyiddiin Al-Barawi (1887–1921), oo ahaa caalim iyo gabayaa caan ka ahaa Baraawe, isla markaana qoray ururintii caanka ahayd ee Qaadiriyadda oo ay ku jiraan taariikh-nololeedyada Shiikh Uways iyo Shiikh Cabdiraxmaan Al-Zaylacii.

Caalim kale oo caan ka ahaa dariiqada Qaadiriyadda wuxuu ahaa Shiikh Cabdiraxmaan Cabdullaahi Al-Qutbi (1879–1952), oo ahaa aqoonyahan ku xeel dheeraa usuusha diinta iyo falsafadda, isla markaana qoray dhowr buug iyo qoraallo badan, kuwaas oo intooda badan aan weli la daabicin. Shiikh Cabdullaahi Al-Qutbi wuxuu dhashay habeenkii uu geeriyooday Shiikh Cabdiraxmaan Al-Zaylacii. Xertiisii caanka ahayd waxaa ka mid ahaa Shiikh Cabdiraxmaan Al-Cayli iyo Shiikh Maxamuud Abgalow. Sidoo kale, culimada Qaadiriyadda waxaa ka dhex muuqday Shiikh Cabdiraxmaan Al-Cayli, oo ku noolaa Warsheekh (1895–1962). Wuxuu ahaa gabayaa wax-soo-saar badan, isaga oo curiyay gabayo badan oo ku saabsan dariiqada Qaadiriyadda, sidoo kalena qoray kitaabka taariikhiga ah ee "Lu'lu'da Qaayimaha" (The Precious Gem). Shiikh Cabdiraxmaan Al-Cayli wuxuu ku dhashay meel u dhow xaruntii waxbarashada Islaamiga ahayd ee Warsheekh sannadkii 1895. Wuxuu halkaas ku baray aasaaska diinta Islaamka isaga oo ay la shaqaynayeen Shiikh Maxamed bin Fiqi Yuusuf, Shiikh Aadan Maxamuud, iyo Shiikh Maxamed Shiikh Xuseen. Wuxuu ijazo (ruqsad cilmiyeed oo dariiqo) ka helay culimo suufi ah oo ay ka mid ahaayeen Shiikh Cabdullaahi Al-Qutbi, Shiikh Axmed Macallin Cusmaan Al-Gandershi, iyo Shiikh Shariif Xasan Cusmaan. Booqashadii taariikhiga ahayd ee Shiikh Cabdiraxmaan Al-Cayli ku tagay qabuuraha culimadii Qaadiriyadda sannadkii 1960 (1380 Hijri) waxay muujinaysaa xididdada qotada dheer ee dariiqada Qaadiriyadda ku lahayd koonfurta Soomaaliya. Intii uu safarkaas ku jiray, isaga iyo saaxiibbadiis waxay

booqdeen in ka badan 40 qabri oo ay ku aasan yihiin culimadii ugu muhiimsanaa ee Qaadiriyadda ee gobollada Banaadir, Bay, iyo Bakool. Magaalooyinka iyo deegaannadii ay booqdeen waxaa ka mid ahaa Warsheekh, Muqdisho, Balcad Al-Amiin, Baydhabo, Buurhakaba, Biyoolay, Gandershe, Marka, Jasiira, Jowhar, Gololey, Afgooye, iyo Warabale (oo u dhow Afgooye). Afartaasatan qabriba mid ka mid ah, haweeneyda keliya ee lagu xusay waxay ahayd Faadumo bint Bahro, oo ahayd hooyadii Shiikh Uways Al-Barawi.

Waxaa ka mid ah culimada Banaadir sidoo kale fuqahadii (culimada ku xeel dheeraa fiqiga Islaamka) ee caan ku ahaa baridda axkaamta iyo shareecada Islaamka, inkastoo aanay sumcad ahaan la mid ahayn culimada Suufiyada. Waxaa si gaar ah loo xusi karaa qoyska sharafta leh ee Al-Faqiih Al-Diin ee Muqdisho, kaas oo qarniyo badan caan ku ahaa soo saarista fuqaho iyo culimo diineed. Xilligii gumaysiga, Shiikh Maxamed, Shiikh Muxyiddiin, iyo walaalkiis Shiikh Abikar Shiikh Muxyiddiin waxay door weyn ka qaateen baridda fiqiga Islaamka, iyaga oo ka soo saaray arday badan xaruntoodii waxbarashada. Qoyska Al-Faqiih Al-Diin wuxuu meel muhiim ah kaga jiraa taariikhda waxbarashada iyo cilmiga Islaamka ee Muqdisho. Waxqabadkooda ku aaddan faafinta iyo baridda fiqiga Islaamka wuxuu door muhiim ah ka qaatay ilaalinta iyo horumarinta dhaqanka diineed iyo waxbarasho ee gobolka. Dadaalladoodu waxay xaqiijiyeen in fiqiga Islaamku uu sii ahaado qayb muhiim ah oo ka mid ah manhajka waxbarashada, halka arday badan oo wax ku bartay gacantooda ay markii dambe noqdeen culimo, fuqaho, iyo shakhsiyaad magac ku leh bulshada Soomaaliyeed.



# XIGASHADA TAARIIKHDA:

## TAARIIKHDU MA AHA WARIN KELIYA



Cabdullaahi Cabdi
(Cabdullaahi Dheere)



Xigashada Sawirka: AI

Dad badan oo Soomaaliyeed waxay ka sheekeeyaan ama ka warramaan dhacdooyin ku jira taariikhda Soomaalida. Inta badan, warintaasi waxay ku ekaataa tilmaamid (descriptive), mana la socoto falanqayn qoto dheer oo ka jawaabta su'aalaha aasaasiga ah ee taariikhda: maxaa dhacay, maxaase sababay inay dhacdooyinku sidaas u dhacaan (analysis and attribution). Taariikhda noocaas ahi waxa ka maqan duruufihii, jawigii, iyo xaaladihii ku xeernaa dhacdooyinka (historical context – السياق التاريخي). Meelaha qaar taariikhda si ula kac ah ayaa looga aamusaa, halka meelo kalena si xad-dhaaf ah loo buunbuuniyo, taas oo inta badan ka dhalata dano, aragtiyo, ama ujeeddooyin siyaasadeed. Arrintan ayay taariikhyahannada iyo falanqeeyayaasha taariikhdu ku tilmaamaan xakamaynta iyo qaabaynta taariikhda (الحجب والتمرير في التاريخ).

Si kastaba ha ahaatee, taariikhdu ma aha ururin dhacdooyin oo keliya; waa isku-dar u dhexeeya xaqiiqooyinka dhacay iyo fasiraadda maskaxda aadanaha.

## FASIRAADDA IYO MACNAHA QARSOON EE TAARIIKHDA

Sida uu caalimkii waynaa ee Ibnu Khalduun tilmaamay, dhacdadu waa xogta muuqata, halka fasiraaddu tahay fahamka macnaha qarsoon ee ka dhasha falanqaynta asbaabaha, duruufaha, iyo is-dhexgalka awoodda iyo bulshada. Marka fasiraadda taariikhda loo jiheeyo dano gaar ah ama aragti hore loo sii qaatay, dhacdadii lafteedu waxay luminaysaa macnaheedii dhabta ahaa, waxayna isu beddeshaa aalad lagu hago ama lagu marin-habaabiyo wacyiga bulshada. Sidaas awgeed, khatarta ugu weyn ee taariikhdu ma aha khaladka ku dhaca warinta dhacdada, balse waa leexinta fasiraaddeeda, maadaama ay si qoto dheer u qaabayso xusuusta wadajirka ah, aqoonsiga bulshada, iyo jihada mustaqbalka.

Ibnu Khalduun wuxuu xusay in taariikhdu leedahay laba waji: mid muuqda iyo mid dahsoon. Wajiga muuqda waxaa lagu arkaa diiwaannada dhacdooyinkii hore, raadadkii dawladihii jiray, quruumihii soo maray, iyo magacyadii xilliyadaas caan baxay.

Halka wajiga dahsoon uu xanbaarsan yahay asbaabihii dhabta ahaa ee keenay dhacdooyinkaas, sida ay wax u dhaceen isuna beddelayeen, iyo falgalkii ka dhex curtay lakabyada kala duwan ee bulshada, iyo weliba saamayntii ka dhalatay faragelinta shisheeyaha iyo kala-qaybsanaanta gudaha. Sidaas darteed, taariikhdu ma aha oo keliya sheeko laga warramo, balse waa cilmi qoto dheer oo u baahan in si xeeldheer loo lafaguro duruufihii iyo xaaladihii ku xeernaa waqtigii ay dhacdooyinku dhaceen.

Taariikhyahanno badan ayaa sidoo kale ka digay in taariikhda lagu akhriyo duruufaha iyo waaqica maanta jira (presentism), maadaama habkaasi uu dhalin karo eex taariikheed oo qalloocisa fahamka dhacdooyinkii hore. Sidoo kale, waxaa laga digaa in dhacdooyin gaar ah si xad-dhaaf ah loo buunbuuniyo ama kuwo kalena laga aamuso sababo la xiriira dano siyaasadeed, aragtiyo hore loo sii qaatay, ama dano kooxeed.

Waxaa kale oo muhiim ah in laga feejignaado isbarbardhigga dhacdooyin ka dhacay waqtiyo iyo juqraafiyo kala duwan, iyadoo aan la adeegsan hab-raac cilmiyeed (methodology) oo ku dhisan daraasadaha isbarbardhigga taariikhda (comparative historical studies). Isbarbardhigga aan tixgelinayn kala duwanaanshaha waqtiga, deegaanka, dhaqanka iyo duruufaha bulsho wuxuu inta badan horseedaa gunaanad aan lahayn saldhig taariikheed oo adag.

Sidoo kale, maraajicda taariikhda lafteedu waa mawduuc u baahan akhris naqdin leh. Gaar ahaan, qoraalladii ay reebeen dalmareennadii reer Galbeedka iyo saraakiishii gumaysigu ma aha kuwo loo qaadan karo xaqiiqooyin kama dambays ah (absolute truth). Marka hore, waxay ku qornaayeen indhaha iyo caqliga dad ka yimid dhaqan iyo aragti ka duwan bulshada ay wax ka qorayeen, iyagoo wax ku qiimaynayay cabbirrada dhaqankooda.

Marka labaad, qoraalladaasi waxay badanaa ahaayeen xog iyo daraasado loo diyaariyey inay taageeraan danaha siyaasadeed, militari ama maamul ee dawladihii gumaysiga. Tani waxay qayb ka ahayd waxa loo yaqaan taariikh-qorista gumaysiga (Imperial historiography), taas oo dhacdooyinka iyo bulshooyinka inta badan ku fasirtay aragtida, danaha iyo himilooyinka quwadihii gumaysiga.

Sidaas darteed, ujeeddadu ma aha in gebi ahaanba la diido ilahaas, balse waa in lagu akhriyo indho naqdin leh, lana barbar dhigo ilo kale iyo habab kale oo taariikh-qoris ah, gaar ahaan taariikh-qorista gumaysi-ka-dib (Postcolonial historiography), si loo helo sawir taariikheed oo dheellitiran.

Tusaale ahaan, buuggiisii First Footsteps in East Africa (1856), Sir Richard Francis Burton wuxuu qoray in Soomaalidu aaminsanaayeen in qaniinyada kaneecadu sababto qandho ama xummad halis ah. Burton wuxuu aqoontaas ay Soomaalidu u lahaayeen xiriirka kaneecada iyo cudurrada ku tilmaamay "khuraafaad", isagoo u arkayay mala-awaal iyo isku-beegmid (coincidence) aan sal lahayn. Hase yeeshee, sannadkii 1880-kii, cilmi-baaris caafimaad ayaa xaqiijisay in cudurka duumadu (malaria) dhab ahaantii ka dhasho qaniiyada kaneecada Anopheles. Tusaalahani wuxuu muujinayaa in mararka qaar aqoonta bulshada deegaanka la dhayalsaday, halka qiimayntii qoraaga ajnabiga ahi ay ku koobnayd aragtidii iyo xaddidaaddii aqoonta ee waqtigiisa.

## XUSUUSTA TAARIIKHIGA AH IYO DHAAWACYADA BULSHADA

Dhanka kale, waxaa jira qaybo ka mid ah taariikhda oo aad u xanuun badan, maadaama ay xambaarsan yihiin dhaawacyadii iyo raadadkii ay ka tageen dhacdooyinkaas. Sidaa darteed, bulshooyinka qaar waxay ula dhaqmaan si taxaddar leh; way diiwaangeliyaan oo ku kaydiyaan xusuus-dhigyo (archives), balse badanaa kuma daraan manhajka waxbarashada, lamana faafiyo si ballaaran, iyagoo ka baqaya in dib u xusuusintaasi ay soo nooleeyaan xiisado iyo colaado hore.

Tusaale ahaan, kadib Dagaalkii Sokeeye ee Spain (1936–1939) iyo xukunkii Jeneraal Francisco Franco (1939–1975), waxaa la isla qaatay siyaasaddii loo yaqaanay Hilmaanka Taariikhda (The Pact of Forgetting – ميثاق النسيان). Ujeeddada laga lahaa waxay ahayd in aan dib loo furin murannadii siyaasadeed iyo dambiyadii la xiriiray dagaalka iyo xukunkii Franco, si dalka loogu gudbiyo marxalad dimuqraadiyadeed oo nabad ah, loogana fogaado in dhaawacyadii hore ay dib u kiciyaan kala-qaybsanaan iyo colaado cusub.

Bulshooyin kale waxay si ula kac ah u jilciyaan eray-bixinta ay ku tilmaamaan colaadaha taariikhdooda soo maray. Tusaale ahaan, colaaddii ka dhacday Northern Ireland inta badan looguma yeero dagaal sokeeye, balse waxaa loogu yeeraa The Troubles, si looga fogaado eray-bixin sii hurin karta kala qaybsanaantii bulshada.

## MASUULIYADDA XIGASHADA TAARIIKHDA

Gabagabadii, raad-raaca taariikhdu waa lama huraan, balse xigashadeeda iyo fasiraaddeedu waa inay noqdaan kuwo dheellitiran oo ku dhisan masuuliyad cilmiyeed. Qofka qoraya ama xiganaya taariikhda waa inuu ka madax-bannaan yahay dagaalladii shalay, kana fogaadaa isku dayga dib-u-qorista taariikhda (rewriting history), isla markaana yeeshaa aragti mustaqbal oo ujeeddadeedu tahay bogsiinta bulshada, xoojinta dib-u-heshiisiinta, iyo hiigsashada mustaqbal dan-wadaag lagu yahay. Sidoo kale, taariikhda waa in laga dheegtaa duruus iyo cibro lagu hago qorshaynta iyo jihaynta mustaqbalka fog.

**W/Q:** Cabdullaahi Cabdi (Cabdullaahi Dheere)



# TAXANAHA "DIIN IYO DAWLAD"

## QEYBTA 4-AAD

Kala soocidda Diinta iyo Siyaasadda: Xaggee bay salka ku haysaa? Islaamkuse muxuu ka qabaa?



Dr. Maxamed Cali Faarax



Xigashada Sawirka: Alharam

# HORDHAC

Taxanaha "Diin iyo Dawlad" waxaan ugasoo hadlay Mad-habka Calmaaniyadda oo diinta ku koobaya xiriirka u dhexeeya qofka iyo Allaha abuuray, nolosha iyo maaraynteedana ka fogaynaya, wuxuuna salka ku hayaa dhaqan reer Galbeed oo diinta u arka mid aan ku habboonayna inay saamayn ku yeelato maaraynta nolosha dhinac kastaba.

Maqaalkan waxaan ku qaadaa-dhigaynaa xiriirka u dhexeeya "Diinta iyo Siyaasadda"; innagoo dul-istaagayna mowqifka ay ka kala taagan yihiin "Calmaaniyiinta" oo iyagu kala soocaya, diintana ku gaar yeelaya xiriirka qofka iyo Allaha abuuray u dhexeeya; dhinaca kalena waxaan dul-istaagaynaa mowqifka Islaamka iyo Islaamiyiintu ay ka taagan yihiin xiriirka u dhexeeya "Diinta iyo Siyaasadda".

Sidaan kusoo faahfaahinnay maqaalkii kusoo baxay Cadadkii 16-aad ee Marag; haddii aan fahanno macnaha iyo qeexidda mid kasta oo ka mid ah diinta iyo siyaasadda, waxaa suurtagal noqonaysa inaan si qoto dheer u garanno xiriirka ka dhexeeya labadooda. Haddaba, xiriirkoodu ma yahay xiriir iska hor imaad iyo isdiiddo ah, oo haddii midkood jiro kan kale meesha ka baxayo? Mise waa xiriir is-dhexgal iyo isku-xirnaan ah, oo midkoodna uusan ka maarmi karin kan kale, isla markaana aan midkoodna si buuxda uga go'i karin kan kale? Mise waa xiriir wada-noolaansho iyo is-faham ah, sida laba qof oo ku kala duwan diin, mad-hab, qowmiyad ama dal, haddana ku heshiis ah inay ka wada shaqeeyaan arrin ka dhaxaysa oo ay dani ugu jirto labadoodaba; ama sida dowlado ku kala duwan dhinaca fikirka iyo mabda'a siyaasadeed ay ugu heshiin karaan wada-noolaansho nabadeed oo ay si wadajir ah u wadaagaan?

# MOWQIFKA CALMAANIYIINTA EE KU AADDAN "DIINTA IYO SIYAASADDA"

Dhanka Cilmaaniyiinta, xiriirka ka dhexeeya diinta iyo siyaasadda waxay u arkaan oo keliya inuu yahay xiriir isdiiddo iyo iska hor imaad ah. Waxay qabaan in diinta iyo siyaasaddu yihiin laba arrimood oo iska soo horjeeda; sidaas darteedna labadoodu aysan kulmi karin.

Waxay aaminsanyihiin inay kala duwan tahay: masaadirtooda (isha ay kasoo burqadaan), dabeecadahooda iyo ujeeddooyinkooduba. Diintu waxay ka timid xag Alle, halka siyaasaddu ay ka timid bani'aadamka. Diintu waxay ku dhisan tahay daahirnimo, toosnaan iyo hufnaan, halka siyaasadda ay ku tilmaamaan khiyaano, leex-leexad iyo dhagar. Diintu waxay hiigsataa aakhiro, halka siyaasaddu ay ku foogan tahay danaha adduunyada.

Sidaas awgeed, waxay qabaan in diinta loo daayo dadka wadaadadda ah iyo masaajidka, halka siyaasaddu ay tahay maaraynta nolosha nooc kasta oo ay tahayba.

Waxaa dalka Israa'iil lagu qabtay siminaar (nadwo cilmiyeed) ay ka qaybgaleen, dhinaca Masar, Dr. Mustafa Khalil, oo ahaa Ra'iisul Wasaarihii hore ee Masar, Boutros Ghali, oo ahaa Wasiiru-dawlaha Arrimaha Dibadda ee Masar, iyo dhowr aqoonyahan oo Israa'iiliyiin ah oo ku takhasusay arrimaha siyaasadda iyo dunida Carabta. Siminaarkaas wuxuu dhacay 19-kii Diseembar 1980.

Intii uu siminaarku socday, Dr. Mustafa Khalil wuxuu hadal u jeediyey ka qaybgalayaashii Israa'iiliyiinta, isagoo yiri: "Waxaan jeclaan lahaa inaan idin xaqiijiyo in annaga Masriyiintu aan kala saarnno diinta iyo qarannimada (qowmiyadda), isla markaana aanan marnaba aqbalayn in hoggaamiyayaasheenna siyaasadeed ay ka shidaal qaataan caqiidooyinkeenna diimeed."

Markii uu Mustafa Khalil hadalkiisa dhammeeyey, ayaa Professor David istaagay oo ugu jawaabay: "Idinku, Masriyiin ahaan, waxaad xor u tihiin inaad kala saartaan diinta iyo siyaasadda; hase yeeshee, waxaan jeclaan lahaa inaan idin sheego in annaga reer Israa'iil ahaan aan diidannahay inaan niraahno Yuhuudnimadu waa diin oo keliya. Taa beddelkeeda, waxaan si cad idiinku adkaynaynaa in Yuhuudnimadu ay tahay diin, shacab, iyo waddan".

Hordhacyadaas oo dhami, ma aha kuwo la aqbali karo. Siyaasadda waxaa ka mid ah waxyaabo uu Ilaahay na faray; siyaasaddduna dhammaanteed ma aha khiyaano, leex-leexad iyo dhagar, balse waxaa ka mid ah siyaasad ku dhisan toosnaan iyo ku dhaqanka mabaadi'da akhlaaqda wanaagsan. Sidoo kale, waxaa jira siyaasad laga leeyahay ujeeddo aakhiro iyo doonista ajarka iyo raalli ahaanshaha Eebbe Weyne.

Waxay kaloo Calmaaniyiintu diidaan fikradda ah in Islaamku yahay diin dhamaystiran oo dhinacyada nolosha oo dhan isku xirta, taas oo ay qaateen dadkana ugu yeeraan dhammaan ducaadda iyo muslixiinta Islaamiga ah ee xilligan casriga ah. Waxay Calmaaniyiintu doonayaan caqiido aan lahayn shareeco, cibaado aan lahayn macaamalaad, diin aan lahayn adduun, dacwo aan lahayn dowlad, iyo xaq aan lahayn awood.

Waxa keliya ee Calmaaniyaddu si cad oo xooggan uga soo horjeeddo waa Shareecada Islaamka; waayo Shareecadu waxay xukunnadeeda ku nidaamisaa dhammaan dhinacyada nolosha Muslimiinta,

waxayna dejisaa xeerar iyo hagayaal ka ilaalinaya jahawareerka iyo leexashada.

Taas waxaa ka mid ah arrimaha quseeya qoyska, bulshada, iyo dowladdaba; sidoo kale Shareecadu waxay nidaamisaa xiriirrada gudaha iyo kuwa dibadda, xilliyada nabadda iyo xilliyada dagaalkaba.

Dhinacyadan oo dhan waxaa si qoto dheer uga hadlay fiqiga Islaamka, iyada oo lagu faahfaahiyey mad-habyadiisa iyo madaaristiisaa kala duwan. Culimada Muslimiintuna waxay ka tageen dhaxal sharciyeed aad u ballaaran oo hodan ah, kaasoo looga maarmayo in loo baahdo sharciyo shisheeye oo diinteenna sal ku lahayn.

Sharciyada laga soo min-guuriyo bulshooyin kale kama soo farcamaan deegaankeenna, mana ka unkamaan caqiidadeenna, qiyamkeenna iyo dhaqammadeenna suubban. Sidaas darteed, waxay ahaanayaan sharciyo shisheeye oo aan bulshada si dabiici ah ula jaanqaadi karin, marwalbana gumaystuhu khasbayo ku dhaqankiisa.

Waxayna Calmaaniyiintu aragtidooda ku dhiseen tiirar iyo mabaadi' ay ka mid yihiin:

1. Inkiridda iyo diidmada fikradda ah "Islaamku waa diin dhamaystiran oo dhinacyada nolosha oo dhan koobaysa" ee ay aaminsan yihiin Islaamiyiintu.

2. In diinta laga sooco siyaasadda, siyaasaddana laga sooco diinta, iyo faafinta oraahda ah: "Siyaasadda diin kuma jirto, diintana siyaasad kuma jirto."

3. In la ceebeeyo lana cambaareeyo dadka ku baaqaya in lagu dhaqmo Shareecada Islaamka, iyadoo lagu eedaynayo inay yihiin "Islaam siyaasadeed" (Political Islam).

4. Sheegashada in diintu siyaasadda ku xaddidayso ku-dhaqanka xaraf-raaca qoraallada diinta, aysanna tixgelin siinayn danaha guud (maslaxadda); sidaas darteedna ay ummaddu ku waayi doonto dano iyo fursado badan, taas oo ka dhalanaysa aragtidan cidhiidhiga ah.

5. Sheegashada in dabaceedda siyaasaddu tahay isbeddel joogto ah, halka diintana loo arko inay ku dhisan tahay sugnaansho aan-isbeddelin; isla markaana dib-u-cusboonaysiinta loo tixgeliyo bidco iyo baadi. Sidaas darteed, ayay ku doodaan in diinta iyo siyaasaddu aysan is waafaqi karin.

## KALA SOOCIDDA DIINTA IYO SIYAASADDA

Waxa ugu horreeya ee ay Calmaaniyiintu ka soo saareen aragtidooda ku aaddan xiriirka ka dhexeeya siyaasadda iyo diinta wuxuu ahaa inay si buuxda u kala saaraan siyaasadda iyo diinta, diintana siyaasadda ka gooyaan. Waxayna faafiyeen oraahda caanka noqotay ee leh: "Siyaasadda diin kuma jirto, diintana siyaasad kuma jirto". Hase yeeshee, oraahdan kuma taagna saldhig adag oo ay cuskan karto marka lagu miisaamo dood cilmiyeed iyo dhaliil maangal ah.

Balse, waxaa kaloo jira qaar xag-jir ah oo ku baaqa in diinta laga sooco nolosha oo dhan, iyagoo qaba inaysan diintu wax door ah ku yeelan karin nolosha bulshada, marka laga reebo inay ku koobnaato damiirka qofka. Haddii loo oggolaado inay kaalin ka sii ballaaran yeelato, waxay ku koobayaan oo keliya gudaha goobaha cibaadada, sida kaniisadda ama masaajidka. Aragtidan ayuu Dr. Cabdul-Wahaab al-Masiiri ugu yeeray: "Cilmaaniyadda dhamaystiran" (العلمانية الشاملة).

Ka doodista oraahda: "Siyaasadda diin kuma jirto"

Haddaba, maxay ka dhigan tahay oraahda ah: "Siyaasadda diin kuma jirto"? Ma waxay ka dhigan tahay in siyaasadda aysan lahayn wax diin ah, sidaas darteedna aysan ku xirnaanayn qiyamka iyo xeerarka diineed, balse ay tahay siyaasad pragmatic ah (waaqici-ku-danaysi ah) oo raacda manfacada meel kasta oo ay ka jirto? manfac maaddi ah, manfac xisbiyeed ama qaran, iyadoo la aaminsan yahay in maslaxadda degdegga ahi ay ka sarreyso diinta iyo mabaadi'deeda, isla markaana Ilaahay amarkiisa iyo reebitaankiisa, iyo xisaabtiisa aakhiro aysan meel ku lahayn dunida siyaasadda?

Runtii, aragtidani waa falsafaddii Machiavelli, oo aaminsanaa siyaasadda akhlaaqda ka arradan, kuna dhisan mabda'a ah: "Ujeeddadu waxay qiil u samaysaa waddada ama habka loo marayo"(الغاية تبرر الوسيلة) .

Waa aragti ay dawladaha keliteliska ah ku marmarsiyoodaan qiilna uga dhigaan dambiyada ay ka galaan shacabkooda, gaar ahaan kuwa ka soo horjeeda. Sidaas darteed, kama waabanayaan inay xasuuqaan mucaaradka, ilaha dhaqaalahana ka jaraan, iyo inay cadaadiska ku sii adkeeyaan, iyagoo ku doodaya in tallaabooyinkaas loo baahan yahay si loo ilaaliyo amniga qaranka iyo xasilloonida dalka.

Bani'aadamku dhab ahaantii ma hagaagi karo haddii aan loo helin siyaasad ay hagayaan qiyamka diinta iyo xeerarka akhlaaqdu, isla markaana ku dhaqanta halbeegyada khayrka iyo sharka, iyo miisaannada xaqa iyo baadilka.

Marka siyaasadda lagu xiro diinta, waxay ka dhigan tahay: in caddaalad lagu dhaqo dadka la maamulayo; in wax loogu qaybiyo si siman; in qofka la dulmiyey looga xaqsooro kan dulmiga u geystay; in qofka

tabarta daran xaqiisa laga siiyo qofka awoodda leh; in dadka loo abuuro fursado siman; in la daryeelo qaybaha nugul ee bulshada, sida agoonta, masaakiinta iyo musaafiriinta ku go'dooma safarka; iyo in si guud loo ilaaliyo xuquuqda aasaasiga ah ee aadamaha.

Diintuna waxay ku dhiirrigelisaa bulshada mu'miniinta ah inay sheegaan hadalka xaqa ah, talo iyo waano siiyaan madaxda, isla markaana la xisaabtamaan, oo ay toosiyaan marka ay ka leexdaan jidka saxda ah. Waa inay xaqa ku hadlaan iyagoo aan ka baqayn canaan qof wax canaanta, si aysan ugu dhicin waxa Qur'aanku uga digay:

(واتقوا فتنة لا تصيبن الذين ظلموا منكم خاصة واعلموا أن الله شديد العقاب) : 25.

"Ka dhowrsada fitno aan ku koobnaan doonin kuwa idinka mid ah ee dulmiga sameeyey oo keliya, ogaada in Eebbe ciqaabtiisu daran tahay" (Suuradda Al-Anfaal: 25).

Sidoo kale, si aysan ugu dhicin wixii Rasuulka uu ummaddiisa uga digay:

((إذا رأيت أمتي تهاب أن تقول للظالم: يا ظالم، فقد تُوُدِّعَ منهم)) رواه أحمد في المسند.

"Haddii aad aragto ummadayda oo ka baqaysa inay qofka dulmiga sameeya ku tiraahdo: 'Daalimow!', markaas la sagootiyey, waxayna la mid tahay ummad dhimatay".

Macnaha hadalka "waa la sagootiyey" waa in markaas aysan khayr ku sii jirin; joogitaankooda iyo maqnaanshahooduna ay isku mid noqonayaan.

## ISLAAMKU SIDEE U ARKAA "CALMAANIYADDA"

Aragtida Islaamka waxaa saldhig u ah in Alle (SWT) uu yahay midka abuuray dunida; islamarkaasna masuul ka ah maamulkeeda, amarkeeda iyo daryeelkeeda sida Quraankuba noo caddeeyey:

(ألا له الخلق والأمر تبارك الله رب العالمين) الأعراف: 54.

Macnaha guud ee aayaddu waa: "Ogaada! Abuuridda iyo amarkaba Isagaa iska leh. Waxaa barakaysan Allaah, Rabbiga caalamka".

Qur'aanka Kariimka ahi wuxuu si cad u buriyey oo u beeniyey aragtida jaahiliyadda shirkiga ah—oo bah-wadaag la ah aragtida Aristotelian-ka—ee ku saabsan baaxadda iyo saamaynta Awoodda Alle. Sida ay labada aragtiyoodba qabaan, Ilaahnimadu waxay ku koobnaanaysaa oo keliya abuuridda; halka maamulka iyo maaraynta nolosha aadamaha ay ka fogaynayaan labada aragtiyoodba Allaha koonka abuuray.

Sidaas awgeed, aragtida Qur'aanku waxay burinaysaa kala-qaybintaas u dhexaysa abuuridda iyo maamulka, ama u dhexaysa awoodda Alle iyo maaraynta nolosha adduunyada. Allaah ma aha oo keliya Abuuraha koonka, balse sidoo kale waa Rabbigiisa, Maamulihiisa iyo Kan leh amarka iyo xukunka.

Alle wuxuu yiri:

(ولئن سألتهم من خلق السموات والأرض ليقولن الله قل أفرأيتم ما تدعون من دون الله إن أرادني الله بضر هل هن كاشفات ضره أو أرادني برحمة هل هن ممسكات رحمته قل حسبي الله عليه يتوكل المتوكلون) الزمر: 38.

Macnaha aayadda: "Haddii aad weydiiso: 'Yaa abuuray samooyinka iyo dhulka?' Waxay hubaal odhanayaan: 'Allaah.' Dheh: 'Bal ka warrama waxa aad Allaah ka sokow baryaysaan; haddii Allaah uu idinla doono dhib, ma iyagaa ka faydi kara dhibkiisa? Ama haddii uu idinla doono naxariis, ma iyagaa celin kara naxariistiisa?' Dheh: 'Allaah ayaa igu filan. Isaga ayay talo saartaan kuwa talo saarta.'"

Aayaddani waxay muujinaysaa is-khilaafka weyn ee ku jiray caqiidada mushrikiinta uu ahaa inay qireen in Allaah yahay Abuuraha samooyinka iyo dhulka, laakiin haddana waxay caabudi jireen waxyaabo kale oo ay u malaynayeen inay dhex-dhexaadin karaan iyaga iyo Alle; ama waxyeello iyo faa'iido keeni karaan.

Marka la barbardhigo aragtida calmaaniyadda, Islaamku wuxuu soo bandhigayaa aragtidiisa ku wajahan baaxadda iyo heerka uu gaarsiisan yahay hawlgalka iyo maamulidda Eebbe (Alle) ee koonka. Alle waa Abuuraha wax kasta, Maamulaha arrin kasta; xitaa arrimaha uu bani'aadamku awood u leeyahay, kuwaas aan ka baxsanayn awooddiisa, rabitaankiisa iyo ficilladiisa, haddana ma aha kuwo uu si madax-bannaan u leeyahay. Bani'aadamku wuxuu leeyahay kaalinta khaliifnimo ee Alle uu u igmaday dhulka; wuxuu maamulaa umuuraha koonka isaga oo ku shaqaynaya idanka Alle, xilka shareecadu saartay iyo mas'uuliyadda khilaafada. Sidaas darteed, bani'aadamku waa wakiilka Alle ee dhulka, waxaana ku waajibay inuu u hoggaansamo Shareecadiisa, taas oo ka dhigan qodobbada heshiiska iyo ballanta khilaafada (istikhlaafka).

Arrintaas waxa caddaynaya hadalka Alle ee Qur'aanka Kariimka ah:

(إن ربّكم الله الذي خلق السموات والأرض في ستة أيام ثم استوى على العرش يدبر الأمر ما من شفيع إلّا من بعد إذنه ذلكم الله ربكم فاعبدوه أفلا تذكرون) سورة يونس: 3.

"Rabbigiinnu waa Alle, kan abuuray samooyinka iyo dhulka lix maalmood gudahood, dabadeedna ku

ekaaday Carshiga. Wuxuu maamulaa amarka oo dhan. Ma jiro cid shafeeco samayn karta idankiisa mooyee. Kaasi waa Alle, Rabbigiin; ee caabuda. Miyeydaan haddaba waano qaadanayn?" (Suuradda Yuunus: 3).

Sidaas awgeed, aragtida Islaamku ka bixiyo baaxadda hawlgalka iyo maamulka Alle (Subxaanahu wa Tacaalaa) waxay gebi ahaanba meesha ka saaraysaa saldhigga ay ku taagan tahay Calmaaniyaddu. Waa wax aan suurtagal ahayn in qalbiga qof Muslim ahi ay ku kulmaan iskuna waafaqaan laba aragti oo is-diiddan: midda rumaynaysa in Alle yahay Maamulaha wax kasta, daryeelaha arrin kasta, isla markaana gacanta ku haya maamulka koonka oo dhan; iyo midda kale ee ku baaqaysa in samada laga gooyo dhulka (Waxyiga Alle iyo diinta la fogeeyo), lagana xoreeyo nolosha iyo ilbaxnimada aadanaha hagidda, xeerarka iyo xuduudaha maamulka Alle.

Sidaa darteed, caqiidada Islaamku ma oggolaanayso in maamulka iyo hanuunka Eebbe laga saaro nolosha bani'aadamka, waayo maamulka Alle wuxuu koobayaa dhammaan dhinacyada jiritaanka iyo nolosha, mana jiro goob ka baxsan hanuunkiisa iyo xukunkiisa.

Waxa kale oo uu aqoonyahanka reer Iswiiserlaand ee ku takhasusay barashada Bariga (Orientalist), Marcel Boisard, adkeeyay kala-duwanaanshaha u dhexeeya sharciga Islaamka (Shareecada) iyo Qaanuunka madaniga ah ee Calmaaniyadda, isaga oo tilmaamay in ay ku kala duwan yihiin: isha (Masdarka) ay ka soo farcamaan iyo ujeeddooyinka ugu dambeeya ee ay hiigsanayaan. Wuxuuna yiri:

"Waxaa muhiim ah in la xuso farqiga asaasiga ah ee u dhexeeya Shareecada Islaamka iyo sharci-dejinta casriga ah ee Yurub, ha noqoto dhinaca ilaha ay ka soo farcamaan ama ujeeddooyinka kama dambaysta ah ee ay hiigsanayaan. Isha sharciga ee dimuqraadiyadda Galbeedka waa rabitaanka shacabka, halka ujeeddadiisuna tahay sugidda nidaamka iyo caddaaladda bulshada dhexdeeda. Islaamka se, sharcigu wuxuu ka soo jeedaa Alle; sidaas darteed, ujeeddada aasaasiga ah ee mu'minku hiigsanayo waa inuu u dhowaado Alle, isaga oo ixtiraamaya waxyiga kuna dhaqmaya xeerarkiisa."

## GUNAANAD

Burburka ku yimid Soomaaliya ayaa sahlay in afkaaro badan oo kharriban oo ay Calmaaniyaddu ka mid tahay ay ku dhex faafaan da'yarta soo koraysa, Dr. Saadiq oo ka faalloonaya arrintaan ayaa yiri: "Afkaarta kharriban ee caalamka meeraysanaysa, ummaduhu sida ay xuduudda u ilaashadaan ayay isaga ilaaliyaan. Haddii xoogagga ciidanka dawladaha ay yihiin kuwa xasiliya nabadgeliyada xuduudaha, aqoon-yahannada iyo mufakiriinta ayaa waxay yihiin waayeelka bulshada ka ilaasha fikradaha dhaawacaya masaalixda bulshadooda. Bur-burka Soomaalida heley wuxuu salka ku hayaa afkaartaas caalamka meeraysanaysa oo meelo fog laga hagayo. Waxgaradkii Soomaalida waa ay ku saaqideen sidii ay ula tacaamuli lahaayeen".

Waa xaqiiqo jirta hadalkaas Dr. Saadiq, balse Soomaaliya aqoon-yahankeedu maku baraarugsan yahay afkaaraha kharriban oo dalka dhex mushaaxaya, laguna dhex faafinayo bulshadeenna gaar dhallinyada iyo da'yarta soo koraysa, iyadoo looga fogaynayo diinta wanaagsan iyo dhaqanka iyo akhlaaqda suubban. Warhooy fadhiga halaga kaco.

## TIXRAAC


1. **الدين والسياسة للدكتور يوسف القرضاوي، من إصدارات المجلس الأوروبي للإفتاء والبحوث، دبلن، 2007.**
2. **الإسلام والعلمانية وجهاً لوجه للدكتور يوسف القرضاي رحمه الله، مكتبة وهبة، القاهرة، 1997م.**
3. **العلمانية بين الغرب والإسلام للدكتور محمد عمارة، دار الدعوة للنشر والتوزيع، الكويت، 1996م.**
4. **مستقبل الثقافة في مصر للدكتور طه حسين، طبعة القاهرة، 1938م.**
5. **Islaamka iyo Calmaaniyadda, Dr. Saadiq Eenow**

# DAWLADNIMO IYO AWOOD BARBAR SOCOTA:

## FAHAMKA KOOXAHA HUBAYSAN



Xildh. Cabdullaahi
Faarax Mire



Xigashada Sawirka: AI

## HORDHAC

Soomaaliya waxaa inta badan lagu tilmaamaa dal ay saameeyeen colaado daba-dheeraaday, nuglaansho dowladeed iyo awoodda dowladda oo aan si buuxda uga hirgelin dhammaan dhulka dalka. Dalka guud ahaan waxaa ka jira awoodo kala duwan oo is barbar socda, kuwaas oo saameyn ku leh amniga, siyaasadda, iyo dhaqaalaha bulshada. Awoodahaas waxaa ka mid ah Dowladda Federaalka Soomaaliya, dowlad-goboleedyada, kooxaha hubaysan, maleeshiyaadka beelaha, ganacsatada iyo shabakadaha siyaasadeed ee ku dhisan dano deegaan, dhaqaale iyo qabiil.

Sidaas darteed, mushkiladda Soomaaliya ma aha oo keliya daciifnimada hay'adaha dowladeed. Waxa muhiim ah in la fahmo sida awooddu u baahsan tahay, u kala qaybsan tahay, isla markaana ay ugu tartamaan ama ay u wada fal-galaan kooxaha kala duwan. Dowladda Federaalka iyo dowlad-goboleedyadu weli si buuxda uguma guulaysan inay dhisaan awood mideysan oo ay ku maamulaan dhulka iyo shacabka dalka oo dhan.

Maqaalkani wuxuu diiradda saarayaa kooxaha hubaysan ee aan si buuxda uga soo horjeedin fikradda dowladnimada, balse aan sidoo kale si buuxda ugu hoggaansamin sarreynta sharciga, hay'adaha rasmiga ah iyo nidaamka maamulka dowladeed. Kooxahan waxaa loo fahmi karaa inay ku jiraan meel u dhexeysa taageeridda dowladda iyo ka madax-bannaanshaha awoodeeda: mararka qaarkood waxay la shaqeeyaan hay'adaha dowliga ah, halka mararka kalena ay ilaashadaan madaxbanaanidooda ayna la tartamaan dawladda.

Fahamka kooxahan wuxuu muhiim u yahay daraasadda dowlad-dhiska Soomaaliya, sababtoo ah kooxaha hubaysan qaarkood waxay buuxiyaan meelaha ay hay'adaha dowladdu ka gaabiso, gaar ahaan dhinacyada amniga iyo xasilloonida deegaannadooda. Hase yeeshee, ku-tiirsanaanta kooxahan waxay sidoo kale abuuri kartaa loollan awoodeed, isla-xisaabtan la'aan, ku-takri-fal awoodeed iyo sii-jiritaanka nidaamyo amni oo ka baxsan taliska iyo sharciga dawladnimo heer Federaal iyo Dawlad Goboleedba.

## JILAYAASHA ISKU-DHAFAN

Buugga Jilayaasha Isku-dhafan: Kooxaha Hubaysan iyo Kala-daadsanaanta Dawladnimada ee Bariga Dhexe (Hybrid Actors: Armed Groups and State Fragmentation in the Middle East) wuxuu soo jeedinayaa in kooxaha hubaysan aan lagu qeexi karin in ay yihiin keliya "kooxo aan dawli ahayn," sababtoo ah qaar badan oo ka mid ahi waxay si mug leh u gutaan shaqooyin dawli ah, kamana baxsana xayndaabka dawladda ay danahooda ka dhex heli karaan. Buugu waxa uu ku qeexay kooxaha hubaysan ee isku-dhafan in ay yihiin kooxo mar la shaqeeya dawladda, marna la tartama, kana faa'iidaysta awoodda dawliga ah markay heshiis yihiin iyagoo aan si buuxda ugu hoos jirin xeerarkeeda. Sidaas awgeed, fikradda buuggu waxay ina ka caawinaysaa fahamka xaaladaha ay dawladnimadu noqoto mid awoodeedu qaybsantahay, halkii ay ahaan lahayd mid mideysan, iyadoo kooxo hubaysan oo leh taageero bulsho, ama leh garab siyaasadeed oo madani, ama raba hirgalinta ajendayaal siyaasadeed oo u adeegaya kooxo siyaasadeed, ay yihiin awoodaha la qaybsada masraxa siyaasadda.

Sida ku cad buugga, kooxaha noocan ahi waxay ka soo baxaan meelaha ay awoodda dawladnimo ka gaabiso bixinta adeegyada bulsho, amni, iyo garsoor. Marka ay taasi dhacdo, kooxaha hubaysan ee isku-dhafan waxay bilaabaan inay buuxiyaan gaabiska dawladda, iyagoo dhista taageero bulsho, awood dhaqaale, iyo matelaad siyaasadeed. Buuggu wuxuu sidoo kale caddeynayaa saddex astaamood oo ay leeyihiin kooxahaas oo kala ah: taageerayaal daacad u ah, xiriir adag oo ay la leeyihiin dawladda ama maamuladda ay heshiiska yihiin, iyo aragti ama dano siyaasadeed oo ay difaacanayaan. Tani waxay muujinaysaa in koox hubaysan oo xoog leh aanay ahayn oo keliya kuwa wata qori iyo rasaas, balse ay noqon karaan jileyaal isku-dhafan oo leh garab hubaysan, mid siyaasadeed iyo mid bulsho oo isku xiran, oo hannaanka dawladnimo ee jira tartan kula jira.

## DAWLADNIMO IYO AWOOD BARBAR SOCOTA

Marka fikraddan lagu dabaqo Soomaaliya, waxa muuqata in dhibaatadu aysan ahayn oo keliya jiritaanka kooxo hubaysan oo ka soo horjeeda hannaanka dawladnimo, balse ay tahay jiritaanka awoodo siyaasadeed oo qoriga u sameeyey ajende siyaasadeed, taageero dhaqaale iyo mid bulsho. Buuggu wuxuu sheegayaa in kooxaha noocan ahi ay ku baraaraan kala-daadsanaanta dawladnimo "state fragmentation," ama kala-qaybsanaanta bulsho iyo siyaasadeed oo lagu waardiyeeyo qori. Soomaaliya maanta waxay tusaale u tahay xaalad ay hay'adaha rasmiga ahi jiraan, balse awooddii fulinta, amniga, iyo gaarsiinta adeegyada bulshada ay si weyn ugu kala firdheen heerar iyo kooxo kala duwan. Taasi waxay ka dhigaysaa in dagaalka

dhabta ahi aanu ahayn mid ciidan oo keliya, balse yahay dagaal ku saabsan cidda leh awoodda sharciyadeed ee xukunka.

Hubka qabaa'ilku haystaan waa xaqiiqo bulsheed iyo siyaasadeed oo Soomaaliya muddo dheer la noolayd, waxaana khatarteeda lagu maareeyaa habab kala duwan oo ku dhisan heshiisyo, xeerar, iyo is-afgarad bulsho. Si kastaba ha ahaatee, khatarta buugu ka digaayo waa marka hubka iyo cududdaas ciidan ay gasho adeegsi siyaasadeed. Marka siyaasiyiin dano gaar ah leh ay isku daraan taageerada qabiilka, awoodda dhaqaale, iyo cududda ciidan ee reerka, waxay abuuri karaan awood aan si buuxda ugu hoos jirin hay'adaha dawladda, balse doonaysa inay saamayn ku yeelato ama is hortaagi kartaa go'aannada dawladeed. Sida uu buugga Hybrid Actors tilmaamayo, koox hubaysan waxay isu beddeli kartaa jile isku-dhafan marka ay yeelato ajende siyaasadeed, taageero bulsho, dhaqaale u gaar ah, xiriir furan oo ay la yeelanayso ciddii taageero siisa, iyo awood ay si madax-bannaan ugu dhaqanto gudaha nidaamka siyaasadeed. Sidaas darteed, khatartu kuma koobna hubka laftiisa, balse waxay ku jirtaa siyaasadaynta hubka iyo u dhalan-rogoshada awood siyaasadeed oo barbar socota dawladda.

Waa hubaal in waayaha iyo duruufaha siyaasadeed ay abuureen kooxo hubaysan, xeryo ciidan, iyo hub iyo ciidan xanbaarsan ajende siyaasadeed, sida ciidamada laga dhaxlay dagaalka lagula jiro argagaxisada, haraadiga hubka madaxda xilalka ka degta ee reerahooda hubaysa iyo hubka ka dhasha colaadaha kala duwan ee dalka ka aloosma. Waxaa aqoonyahanka buugga qoray isku raacsan yihiin, in si kasta oo loo madax salaaxo awoodaha hubaysan ee dawladnimada barbar socda, ay ugu danbaynta abuuri doonaan khal-khal amni, ama horseed ka noqon doonaan dagaallo sokeeye oo xanuun badan. Tusaale waxaa noogu filan awoodda Dacmi Sariic oo abuuratay taageero bulsho, dhaqaale, ugu danbayna yeelatay ajende siyaasadeed oo tartan la galay dawladdii dhexe ee Suudaan. Natiijada ka dhalatayna ay noqotay dagaal sokeeye oo lagu hoobtay, sababayna qax, khasaare nafeed iyo burbur dhaqaale oo baahsan. Sidoo kale, Soomaaliya waxaa fudud in ciidan qabiil ama mid ku yimi duruufo gaar ah, horjoogayaashiisu yeeshaan damac siyaasadeed, waana khataraha uu buugaani ka digaayo.

## SIDEE XAL WAARA LOO HELI KARAA?

Si loo helo xal waara, waa in la fahmo in kooxaha isku-dhafan (hybrid actors) ay ka duwan yihiin kooxaha argagixiso sida Al-Shabaab ama kooxaha siyaasadeed ee caadiga ah, ee aan hubaysnayn. Sida buugu tilmaamayo, waa kooxo marna dawladda ku milan, marna tartan kula jira, iyadoo dagaal lagu burburiyo oo keliya, ama heshiis lagu qaboojiyo midna uunan keeni karin xal waara. Balse ay qasab tahay in la xoojiyo hannaanka dawladnimo, isla markaana la yareeyo fursadaha ay kooxahaani ku heli karaan sharciyad iyo taageero ay ku sii wadan karaan jiritaan hubaysan oo ka baxsan xayndaabka dawladnimada. Arrinta ugu muhiimsan ayaa ah in hannaanka dawladnimo uu noqdo mid dhowra heshiisyada bulshada, lana saadaalin karo hab-dhaqankiisa siyaasadeed, hannaanka iyo waqtiga doorashooyinka, adeegsiga awoodda dawladnimo si waafaqsan shuruucda iyo xeerarka dalka, iyo hirgelinta hannaan caddaaladeed oo loo dhanyahay.

## GUNAANAD

Ugu dambayn, xalka waara ee khataraha kooxaha isku-dhafan wuxuu ku saleysan yahay fahamka in dawladnimo ay tahay hannaan sharciyeed oo dhammaystiran, oo aysan ahayn awoodo is barbar socda. Dawladnimo waa in ay ka dhigan tahay in awoodda oo dhammi: amni, dhaqaale, siyaasad, iyo garsoor, ay hoos yimaadaan sharciga oo ay u adeegaan bulshada oo dhan.

Haddii aanan ku guuleysan inaan dhisno dawladnimo dhab ah oo ku saleysan heshiisyo bulsho, caddaalad, iyo maareynta sharciga, kooxaha isku-dhafan waxay sii ahaan doonaan khataraha ugu weyn ee deganaanshaha iyo xasilloonida dadka. Sidaas darteed, xalku waa in uu ka bilaabmaa gudaha, iyadoo la dhisayo dawladnimo dadkeeda u adeegta, kalsoonina ka haysata, soona xirta albaabka in qof siyaasi ah ku khasbanaado in uu damaciisa siyaasadeed ku waardiyeeyo ama ku kabo qori ama adeegsiga hannaanka kooxaha isku-dhafan ee khatarahooda buugaani uu aad uga digay.

# GARSOORKA IYO HALBEEGGA CADAALADDA DALKA

## QAYBTA 1-AAD



Farxaan Cabdirashid Sugulle



## HORDHAC

Garsoorku waa tiirka saddexaad ee dowladnimada, waana hay'adda laf-dhabarta u ah xaqiijinta sarreynta sharciga iyo ilaalinta xuquuqda muwaadiniinta. Wuxuu fasiraa oo dabaqaa shuruucda, isla markaana si caddaalad, madax-bannaani iyo dhexdhexaadnimo leh uga garnaqa khilaafaadka iyo dacwadaha. Hufnaanta iyo madaxbannaanida garsoorku wuxuu door muhiim ah ka qaataa dhismaha kalsoonida bulshada, ilaalinta sinnaanta sharciga hortiisa iyo xaqiijinta in qof kastaa helo caddaalad ku dhisan hannaan sharci oo sax ah.

## ASALKA GARSOORKA

Garsoorku asal ahaan wuxuu soo jiray tan iyo waqtiyadii hore ee aadanaha, waxaana uu ka dhashay baahida loo qabo in la xalliyo khilaafaadka, lagu ilaaliyo xuquuqda dadka, lana xaqiijiyo caddaalad iyo kala dambeyn bulshada dhexdeeda.

## HALBEEGA CADAALAD

Halbeegga caddaaladdu waa cabbirka lagu qiimeeyo in xukunnada maxkamadaha iyo habraacyada go'aan-qaadashadu waafaqsan yihiin sharciga, mabaadi'da caddaaladda iyo ilaalinta xuquuqda dadka.

## TAARIIKHDA GARSOORKA SOOMAALIYA

Garsoorka Soomaaliya wuxuu soo maray marxalado kala duwan oo taariikhi ah, kuwaas oo guud ahaan loo qaybin karo saddex marxaladood oo waaweyn:

1) Xilligii Gumeysiga ka Hor

2) Xilligii Gumeysiga

3) Xilligii Xornimada ka Dib

4) Xilligii Gumeysiga ka Hor

Xilligii gumeysiga ka hor, Soomaaliya ma lahayn nidaam maxkamadeed oo dowladeed oo casri ah, balse bulshada Soomaaliyeed waxay lahayd habab dhaqameed iyo kuwo diimeed oo lagu xalliyo khilaafaadka. Caddaaladda waxaa inta badan lagu saleeyn jiray Shareecada Islaamka, xeer-dhaqameedka iyo heshiisyada bulshada.

Khilaafaadka waxaa xallin jiray culimada, odayaasha dhaqanka, salaadiinta iyo hoggaamiyeyaasha bulshada, iyadoo ujeeddadu ahayd in la gaaro xal caddaalad ah, dibna loo soo celiyo nabadda iyo xiriirka bulshada. Garsoorka xilligaas waxaa si weyn loogu tiirsanaa laba tiir oo waaweyn:

1. Shareecada Islaamka – gaar ahaan meelihii ay ka jireen culimo iyo maamullo Islaami ah.
2. Xeer-dhaqameedka Soomaaliyeed – kaas oo lagu xallin jiray khilaafaadka bulshada, sida dilalka, dhaawacyada, murannada dhulka, xoolaha iyo khilaafaadka qoysaska.

## XILLIGII GUMEYSIGA

Xilligii gumeysiga, nidaamka garsoorka Soomaaliya wuxuu galay marxalad cusub, waxaana la bilaabay in la sameeyo maxkamado iyo hay'ado garsoor oo ku dhisan nidaamyadii sharci ee ay keeneen quwadihii gumeysiga. Si kastaba ha ahaatee, nidaamka garsoorku wuxuu ku kala duwanaa deegaannadii ay kala maamulayeen quwadihii gumeysiga.

Garsoorka xilligaas waxaa saameyn ku yeeshay sharciga gumeysiga, Shareecada Islaamka iyo xeer-dhaqameedka Soomaaliyeed. Arrimaha qaarkood waxaa lagu xallin jiray maxkamadaha gumeysiga, halka arrimaha la xiriira qoyska, guurka, dhaxalka iyo arrimo kale oo bulshada ah lagu dabaqi jiray Shareecada Islaamka ama xeerarka dhaqanka.

Sidoo kale, waxaa la sameeyay maxkamado iyo nidaamyo sharci oo rasmi ah, waxaana soo baxay habraacyo la xiriira dacwadaha, garsoorayaasha, qareennada iyo fulinta xukunnada.

## XILLIGII XORNIMADA KA DIB

Xilligii xornimada ka dib, gaar ahaan markii Soomaaliya ay xornimada qaadatay 1960, waxaa bilaabmay dhismaha nidaam garsoor oo qaran oo mideysan. Dowladda Soomaaliya waxay dadaal ku bixisay in la mideeyo nidaamyadii

sharci iyo garsoor ee kala duwanaa ee jiray xilligii gumeysiga.

Garsoorka waxaa loo dhisay maxkamado heerar kala duwan leh, waxaana la sameeyay sharciyo qaran oo nidaamiya habka garsoorka, dacwadaha iyo xukunnada. Sidoo kale, waxaa la isku dayay in la waafajiyo Shareecada Islaamka, xeer-dhaqameedka Soomaaliyeed iyo nidaamka sharciga casriga ah.

Xilligii dowladdii milatariga ahayd ee ka dambeysay 1969, nidaamka garsoorka wuxuu maray isbeddello waaweyn, iyadoo la soo saaray sharciyo cusub iyo qaabab cusub oo maamulka garsoorka ah.

Kadib burburkii dowladdii dhexe ee 1991, nidaamka garsoorka Soomaaliya wuxuu galay marxalad adag, waxaana meelo badan ka hanaqaaday nidaamyo kala duwan oo ay ka mid yihiin garsoorka dowlad-goboleedyada, maxkamadaha dhaqanka iyo Shareecada Islaamka.














































**Website**: https://maragnews.com/
**Email**: editor@maragnews.com

MAJALADDA
MARAG